# Golaha Wakiillada

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### *Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 4aad fadhigii 11aad*

***Wakhtiga uu Furma:-*** 09:36 AM
***Taariikhda:- Axad, 09October 2022***

**Guddoonka: -** Md. Cabdirisaaq Khaliid Axmed

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

Ajandaha Fadhiga:- Maalinta 1aad ee Doodda Xeerka Shirkadaha Caymiska.

**Guddoomiye Cabdirisaaq Khaliif Axmed:** Mudanayaal, fadhigu wuu inoo furan yahay, waxaanan marka hore ku furanaynaa Quraanka Kariimka ah oo uu inoo akhriyo **Sh. Axmed Dayib Aadan**. Ilaahay ha inagu anfaco Aayadaha Quraanka Kariimka ah. Golaha waynu furanaynaa, waxaana fadhiya **44 Mudane**, waxaanan maanta bilaabi doonaa **Doodda Xeerka Caymiska**, iyada oo maalintii hore ay **saddex Mudane** is qoreen. Mudanayaasha aan is qorin-na hadda ayaynu qoraynaa.

Waxaan Xoghaynta farayaa in ay Mudanayaasha dooda u qoraan inta aan xaadirinta wadno, waxaana ugu horaysiinayaa saddexdii Mudane ee maalintii hore is qoray. Waxaanan ku soo dhaweynayaa;

**Md. Mustafe Axmed Cabdilaahi (Khayreeye)** *(12min, 55sec)* Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha, shaqaalaha iyo Saxaafadda. Waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka: **Salaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu.**

Sida aynu la soconno, waxaa muddooyinkii u dambeeyay Golahan hor yaallay **Xeerkii Caymiska**, xeerkaas oo marxalado kala duwan soo maray, haddana ay Golaha keentay **guddi gaar ahi**. Sidoo kale, Xeerka Caymisku waa wax dalkeenna ku cusub, waana in aynu maslaxadda qaranka ka eegno, innagoo mudnaanta koowaad siinayna **Diinta Islaamka**.

Mudanayaal, qodobada guud ee Xeerka Caymiska guud ahaan waa **maamulka iyo korjoogtaynta shirkadaha caymiska**, sidoo kalena **ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta**. Haddii Culimadu inoo sheegaan wixii maslaxad ku jirta, bulshada waa lagu qasbi karaa.

Waxa la hayaa tirokoob muujinaya **dhimasho gaadhaysa 200 qof sanadkii**, **dhaawac gaadhaya 3000**, iyo **khasaare maaliyadeed oo sanadkii ah 40,000,000**. Waxaynu u baahan

nahay, maadaama oo aynu ganacsi la leenahay adduunka, in aynu caymiska galno, waana in aynu qaadanno caymiska.

Marka hore, Xeerkani waa **Xeerka Maamulka Shirkadaha Caymiska**, waxaana ka farcamaya **Xeer-nidaamiyeyaasha caymiska** qaybahooda kala duwan, oo kala ah **Caymiska Guud** iyo **Caymiska Caafimaadka**; gaadiidka, dabka, travel-ka iwm, dhammaantoodna waxay soo galaan **Caymiska Guud**.

Sababta Xeerkani inoogu fadhiyo waa in uu yahay **Xeer Maamul**, oo aan si toos ah u taabanayn adeegyada caymiska laftiisa, balse uu yahay xeerkii lagu maamuli lahaa shirkadaha caymiska bixiya. **Qodobka 53aad** waa qodobka Hay'adda siinaya awoodda ay ku jidaynayso in shirkaduhu bixin karaan noocyada kala duwan ee caymiska.

**FG:** Haddaba, caymisyo badan oo dalkeenna ka jira waa **qasab**, waxaana ka mid ah **Travel Insurance**. Waynu ognahay meelo badan in aynaan u dhoofin ilaa aynu qaadanno caymis; xataa **Xajka** waa qasab in la qaato caymis.

Qodobka 53aad haddii laga saaro, waxaan Golaha waydiinayaa: **Xeerkani muxuu soo kordhiyey?** Waxay la mid noqonaysaa sida aynu hadda nahay. Sidaas awgeed, waa in sidiisii hore loo daayaa.

Gudidu waxay ku sababeeyeen in ay Culimo la tashadeen. Halkan waxaynu ku haynaa **57 dawladod oo Muslim ah** oo Culimadoodu qasab ka dhigeen caymiska, gaar ahaan kan gaadiidka, iyada oo **Sacuudigu** ugu horreeyo.

Waxaynu haynaa **Wasiirkii Diinta** oo isaguna inoo sheegay in la waajibiyo caymiska gaadiidka iyo dabka, isla markaana caddeeyey in uu Culimo kala soo tashaday. Waxa kale oo aynu haynaa qaar ka mid ah Culimada waaweyn iyo aqoonyahanno diinta ku takhasusay oo inoo sheegay in haddii maslaxad ku jirto, la qasbi karo. Halkaa waxa inooga cad in ay arrintani tahay **mas'alo ijtihaadi ah** oo lagu kala duwanaan karo. Sidaas darteed, sabab aynu u qaadanno mawqif meesha ka saaraya xeerka ma muuqato.

**Qodobka 3aad: Caymiska Tacaawuniga ah:** Waxaynu ku matali karnaa Dawlad ku qasbaysa bulshada in ay ceelal iyo balliyo qodaan oo ay iyagu ka cabbaan. Kaalinta Dawladdu waa askariga waardiyaynaya, kaalinta shirkaduhuna waa maamulka biyaha dadka ka dhexeeya. Sidaas darteed, halkaa kama muuqato wax culays ah oo la dulsaaray, balse waa iskaashi la wada maamulayo oo dantooda loo maamulayo.

Sidaa darteed, Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan soo jeedinayaa in Xeerka la sii daayo, **Qodobka 53aadna loo daayo sidiisii hore**.

Qodobada Xeerka Caymiska guud ahaan waa maamulka iyo korjoogtaynta shirkadaha caymiska, iyo ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta. Haddii Culimadu inoo sheegaan wixii maslaxad ku jirta, bulshada waa lagu qasbi karaa.

Waxaan doodayda ku dhisayaa qaacidada fiqiga ah ee oranaysa: **(التصرف على الرعية منوط بالمصلحة)** *(Go'aamada xaakimku waxay ku xidhanyihiin maslaxadda bulshada).*

Shareecadu waxay maslaxad u taqaannaa: **keenista danta iyo ka hortagga dhibaatooyinka**. Go'aan walba oo lagu maaraynayo dhibaato jirta ama lagaga hortagayo dhibaato iman karta, caymisku wuu soo gelayaa. Caymisku wuxuu wax weyn ka tarayaa yaraynta dhibaatooyinka dhaqaale iyo culayska bulshada saaran, dheeftiisuna waa in ay ka badnaataa waxyeellada. Dheeftiisa waxaa ka mid ah in uu mideeyo qabaa'ilka Somaliland si ay magta wada bixinayaan.

Waa in aan cid gaar ah loogu danaynin, waayo waa xeer khuseeya dhammaan muwaadiniinta Somaliland. **Qodobka 1aad:** Maxaa lagu miisaamayaa in caymisku maslaxad leeyahay? Waxa la hayaa tirokoob muujinaya: dhimasho ilaa **200 qof sanadkii**, dhaawac **3000**, shilal gaadiid **4000–5000**, shilal dab ilaa **2000**, iyo khasaare maaliyadeed **40–50 milyan dollar sanadkii**.

Ganacsiga aynu dunida la leenahay wuxuu u baahan yahay caymis. Tusaale ahaan, **Marinka Berbera–Wajaale**, haddii aan caymis la helin, way adkaanaysaa in ajaanib lala ganacsado. Sidaas awgeed, waxa la inooga baahan yahay in aynu saddex arrimood is-waafajino:

1. Diinteena (in aynu qaadanno **Caymiska Tacaawuniga ah**);
2. Danta bulshada (midaynta awoodaha bulshada si loo xalliyo shilalka soo noqnoqda);
3. Danta guud ee Qaranka iyo suurtagelinta ganacsiga caalamiga ah.

Haddaba, Xeerka Caymiska, gaar ahaan qaybta loo yaqaan **Third-Party (magdhawga dhibbanaha)**, waa in uu noqdaa mid **qasab ah**, si xal loogu helo gaadiidka Itoobiya, DPW, shirkadaha ajaanibka ee dalka jooga iyo muwaadiniinta.

**Third-Party** waxay ka kooban tahay:

- Shirkadda Caymiska
- Eedaysanaha
- Dhibbanaha

Sidaas darteed, Mudanayaal, masuuliyad weyn ayaa inaga saaran ilaalinta **Shareecada Islaamka** iyo **Maqaasiiddeeda**, sida uu **Dastuurku** tilmaamay; wixii ka hor imanayana Dastuurka ayaa inaga reebay.

Caymiska baadhid badan ayaanu ku samaynay, waxaanan isla qiraynaa in **caymiska tijaariga** uu leeyahay **xukun rabaani ah oo ku dhacay**. Sidaa awgeed, **caymiska aynu maanta wadnaa waa Caymiska Tacaawuniga ah**.

Waxaan soo jeedinayaa in **Xeerka sidaas lagu ansixiyo**, isla markaana **sidaas lagu sii daayo**. Waxaan soo jeedinayaa in **Qodobka 53aad** ee ay Guddidu soo jeedisay in laga saaro **aan laga saarin**, balse **la daayo**, si mararka qaarkood dadka loogu qasbi karo inay caymiska galaan.
Sidoo kale, waxaan soo jeedinayaa in **shirkadaha caymiska laga rabo lacag cayiman (capital)**, si loo ogaado **awoodda iyo kartida dhaqaale** ee ay leeyihiin.

**Md. Jaamac Abokor Maxamed** *(5 daqiiqo, 25 ilbiriqsi)* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha, shaqaalaha iyo Saxaafadda; waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka: **Salaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu.**

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, **Xeerkan Caymisku** waxa uu innagu hor yaallay tan iyo markii aynu Golaha nimid. Waa xeer **muhiimad gaar ah u leh qaranka**, isla markaana saameyn ku leh **nabadgalyada bulshada iyo dhaqaalaha dalka**.

Shirkad ama qof kasta oo doonaya in uu innala galo ganacsi, waxa ugu horreeya ee uu innaga weydiiyaa waa: **Caymis (Insurance) ma leedihiin iyo Baank (Bank) ma leedihiin?**

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, **Caymiska Islaamiga ahi** waa **shuraako bulsho**, ama waa **qaadhaan bulsho oo la isku darsaday**, looguna talogalay in lagu daboolo **dhibaatooyinka iyo khasaaraha iman kara**.

Xeerka Caymisku wuxuu dhalinayaa **tababar, taxaddar iyo feejignaan**, si loo yareeyo **khasaaraha nafeed iyo kan maaliyadeed** ee maalin kasta aynu la kulanno. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, soo-jeedintayda ku saabsan Xeerka waxa ay khusaystaa **Qodobka 53aad**, kaas oo dhigaya:

"Hay'addu, iyada oo adeegsanaysa xeer-nidaamiyeyaal, waxa ay amar ku bixin kartaa in caymisyada qaar ama dhammaan noocyada kala duwan ee caymisyada ay qaataan dadka ama shirkadaha degan Somaliland, iyada oo lala galayo heshiis caymis adeeg-bixiyeyaal maxalli ah." Nuxurka qodobkan 53aad, Guddidii Golaha diray waxay soo jeedisay in **gebi ahaanba laga saaro**, iyaga oo ku sababeeyay in **culimada qaar** ay qabaan in uu **khilaafsan yahay Diinta Islaamka**.

Anigu se, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan qabaa in **Xeerkan aanu marnaba socon karin Qodobka 53aad la'aantiis**. Waxaan ku sababaynayaa in ay jiraan **in ka badan konton dal oo Islaam ah** oo caymisku ka yahay **waajib**.

Waxaan halkan ku hayaa **waraaqdii Wasiirka Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta Somaliland, Sheekh Albaani**, kuna taariikhaysan **09/04/2022**, taas oo ku socotay Guddoomiyaha Hay'adda Caymiska Qaranka, isla markaana ogaysiis laga siiyay Madaxweynaha, Xeer Ilaalinta Guud, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Shir-guddoonka Golaha Wakiillada.

Nuxurka warqadda Wasiirku waxa ay leedahay:

*"Kadib markii aan la tashanay qaar ka mid ah culimada waaweyn ee dalka, waxaan soo jeedinaynaa in la jideeyo amrida caymiska lagama maarmaanka ah ee xalaasha ah."*

Waxa kale oo arrintan ka hadlay **Muftiga Dawladda Sucuudiga, Sheekh Cabdilcasiis bin Cabdalla Aala Sheekh**, oo la weydiiyay in caymiska gaadiidka la qasbi karo, kuna jawaabay in **Dawladdu xaq u leedahay in ay qasbi karto**.

Sidoo kale, culimo reer Somaliland ah oo ay ka mid yihiin **Dr. Sheekh Xasan Sheekh Cali Warsame** iyo **Sheekh Barbaraawi**, ayaa caddeeyay in Dawladdu qasbi karto caymiska haddii **maslaxad guud** ku jirto. Haddii aan la qasbin caymiska, **dadku ma geli doonaan**, maaddaama ay haystaan ikhtiyaar sharci ah, shirkadaha caymiskuna **ma sii wadi karaan shaqadooda**.

Tusaale ahaan, waxa jiray nin reer Somaliland ah oo **gaadhi Itoobiya laga leeyahay** ku jiidhay Gabiley; magtiisii markii loo doontay Itoobiya, caymiskii Itoobiya wuxuu bixiyay **$3,000**, halka annagu aynu mararka qaar kala qaadanno **$30,000 ama ka badan**. Haddii Xeerka Caymiska Somaliland dhaqan geli lahaa, khasab bay ku noqon lahayd in iyaguna bixiyaan wixii aynu kala qaadanno.

Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa **in Qodobka 53aad aan laga saarin Xeerka**. Gunaanadkayguna waa in **Xeer kasta oo maslaxadda ummadda ku jirta lagu qasbi karo**.

**Md. Cabdikariin Meecaan Xuseen** *(5 daqiiqo, 10 ilbiriqsi)*:- Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha, shaqaalaha iyo Saxaafadda; waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka: **Salaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu.**

Waxaan halkan ka soo qaadanayaa **Qodobka 6aad, farqaddiisa 8aad**, oo odhanaya: "Adeegga caymisku waa adeeg furan; cid kasta oo leh awoodda bixinta caymiska way bixin kartaa, sidaas darteed cid gaar ah oo kooto loogu xidhayaa ma jirto, sidoo kale cidna laguma qasbi karo."

Xeerkan muddo dheer ayuu inala yaallay, waxaana aynu mar walba ka doodaynay **caymiska yaan qasab laga dhigin iyo in qasab laga dhigo**. Caymisku guud ahaan waxa uu u kala baxaa laba qaybood:

- marka aad joogto **dal Islaam ah**;
- iyo marka aad joogto **dal aan Islaam ahayn**.

Sidoo kale, caymiska waxa loo kala qaybiyaa **caymis dhamaystiran** iyo **caymis haaf ah**. Caymiska dhamaystiran waa mid ikhtiyaari noqon kara, balse **caymiska haafka ah**—kaas oo ah in aad bixiso **khasaaraha aad cid u geysatay**—waa mid **qasab ah** dalal badan, gaar ahaan kuwa Islaamka.

Anigu waxaan qabaa, marka loo eego culimada Islaamka iyo waddamada Islaamka, in caymiskani yahay **waajib**, isla markaana uu bulshada ka ilaalin karo **is-qabsi iyo khilaaf**.

Sidaas darteed, waxaan ka soo horjeedaa in mar kale lagu noqdo doodda ah **"yaan qasab laga dhigin Qodobka 53aad"**. Waxaan soo jeedinayaa in **caymiska haafka ahi noqdo mid qasab ah**, maaddaama aynu nahay **dal doonaya aqoonsi, maalgashi caalami ah, iyo imaanshaha shirkado shisheeye**.

Dal aan lahayn nidaam caymis oo waajib ah, **ma raadsan karo aqoonsi caalami ah**. Waxaan soo jeedinayaa in **caymiska haafka ah** lagu qasbo gaadiidka, halka caymiska dhamaystiran uu noqdo ikhtiyaar.

Waxa laga yaabaa haddii shirkado caymis ahi yimaadaan in aanay wada bixin karin wixii khasaare ah, maadaama oo aanay dad badani ku jirin oo doonaya inay wax caymiyaan, kharashka ay bixinayaanna uu yaraado.

Sidaas awgeed, maadaama oo aynu joogno **qarniyadii 21aad**, isla markaana ay jiraan **dalal badan oo Islaamka ah oo inooga horeeyey**, waxaan soo jeedinayaa in aynu **qaadanno Caymiska Islaamiga ah**, isla markaana **qasab kaga dhigno dalkeenna**.

Waxaan soo jeedinayaa in aynu qaadanno caymiska, isla markaana aynu eegno sida **waddamada Islaamka ah ee inooga horeeyey** ay u qaataan. Caymiska marka uu soo kordho, wuxuu naga caawinayaa **ilaalinta shuruucda waddooyinka** iyo **nidaamka gaadiidka**.

Caymisku wuxuu wax badan ka tari doonaa **badbaadada shacabka**, sidaas awgeed waxaan soo jeedinayaa in **Xeerkan la sii daayo oo la ansixiyo**. Caymisku wuxuu caawinayaa **ciidamada nabadgalyada**, wuxuu ilaalinayaa **sharcinimada darawalka**, xataa dhinaca maskaxdiisana waa la eegayaa, taas oo ku riixaysa inuu xoogga saaro **badqabka gaadiidka iyo waddooyinka**.

Shilalka ugu badan waxa ay ka dhacaan **Gabiley**, caymiskuna wuxuu damaanad qaadi doonaa **nabadgalyada waddooyinka**. Maadaama oo xeerkani muddo ina yaallay, waxaan soo jeedinayaa **in la ansixiyo lana sii daayo**.

**Md. Saleebaan Axmed Carab** *(3 daqiiqo, 10 ilbiriqsi):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Saxaafadda; **Salaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu.**

Xeerkani muddo badan ayuu inala yaallay, dood badanna waa laga galay. Waxaan u arkaa inuu xambaarsan yahay arrin aad u muhiim ah, taas oo ah **helitaanka Caymis Islaami ah**.

Baahi weyn ayaa jirta, waayo waxaynu nahay **waddan aan weli la aqoonsan**, haddana u baahan in uu yeesho **shuruuc uu la wadaago bulshada dhexdeeda iyo dalalka deriska ahba**.

Marka la joogo jidadka iyo ganacsiga, su'aalaha ugu waaweyn ee la is weydiiyo waa caymiska. Culimadeennii way ka doodeen arrintan; qaar meel ayay ka eegeen, qaarna meel kale ayay ka eegeen. Ugu dambayntiina waxa caddaatay in **waddankeennu maanta u baahan yahay Caymis Islaami ah**.

Haddii aynu helnay **hay'ado awood u leh** inay buuxiyaan shuruudaha caymiska, habkoodana la baadhay oo la hubiyey, waa **waajib inagu ah** in aynu u fududeyno wixii sharcigu oggol yahay.

Baahidu way badan tahay; dadkii iyo gaadiidkii way isku bateen, guri kastana waxa yaalla **3 ama 4 gaadhi**. Maalin kasta waxa dhacaya shilal, qof miskiin ahna waxa la yidhaa "intan ayaa kugu qabatay", iyadoo ay jiraan abaaro iyo gurmad joogto ah.

Sanad kasta waxa aynu la kulannaa **in ka badan 20 shil**, iyada oo baabuurta badankoodu aanay wax dheef ah bulshada u soo kordhin. Haddii hay'ado yidhaahdaan "waan cayminaynaa inta tamarteena ah", inkasta oo aanay dabooli karin baahida oo dhan, haddana haddii ay inta ugu waaweyn qaabilaan, waa in **loo fududeeyaa lana dedejiyaa sharciga inagu raagay**.

**Md. Cabdikariin Aadan Cali** *(5 daqiiqo, 56 ilbiriqsi):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Saxaafadda; **Salaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu.**

Arrintani waa mid waafaqsan **diinteena Islaamka**. Markaynu joogno Somaliland, dhammaanteen waynu ognahay in aynu doonayno in aynu raacno **nidaamka Islaamiga ah**, sida ku cad **Qodobka 1aad ee xeerka nala soo gudbiyey**.

Haddii aynu nahay bulsho Islaam ah oo aaminsan ku dhaqanka Shareecada Islaamka, waa in aynu qaadannaa **nidaamka takaafuulka**, kaas oo aan ahayn nidaam faa'iido-doon ah, balse ah **nidaam bulshada loogu danaynayo**.

Nidaamkan waxa uu:

- Yareynayaa khatarta;
- Ka hortagayaa dhibaato dhaqaale;
- Ka hortagayaa ribo;
- Ka hortagayaa khamaar iyo hubanti la'aan.

Iskaashi waxa loola jeedaa nidaam xubnuhu si siman uga qayb qaataan, iyaga oo aan u jeedadoodu ahayn faa'iido gaar ah ama mushahar, balse ah **dan guud oo laga wada shaqaynayo**.

Waxaan soo jeedinayaa in **Qodobka 53aad aan meesha laga saarin**, balse wax laga beddelo, maadaama Hay'adda Caymisku tahay mid **korjoogteynaysa, maamuleysa, jihaynaysa, kana shaqaynaysa habaynta nidaamka caymiska**.

Hay'addu waa inay:

- Abaabushaa dadka iyo gaadiidka;
- Isku xidhdaa iskaashatooyinka;
- Casriyeysaa nidaamkii dhaqanka ahaa ee hore u jiray.

Qodobka 48aad ee sheegaya in hay'addu abuuri karto **Maareeye Idman** waa mid suurtagal ah, balse waa in aan lagu keenin culays cusub bulshada, waana in arrintaas lala tashadaa **guddiyada iyo xubnaha ay khusayso**, si looga hortago dhibaatooyin dambe.

Waxaan aad u taageerayaa in caymis la sameeyo, balse **lama qasbi karo dadka**, isla markaana waa in la horumariyaa nidaamka caymiska Islaamiga ah ee diinteennu ina fartay, lana waafajiyo nidaamka casriga ah.

**Md. Cabdilaahi Muuse Cabdi** *(5 daqiiqo, 41 ilbiriqsi)*:- Bismillaahi Raxmaani Raxiim, **Wa bihi nasta'iinu calaa umuuri dunyaa wa diin.** Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha Golaha, Saxaafadda iyo Marti-sharafta; **Salaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu.**

Marka hore, waxaan u mahadnaqayaa **Guddidii ka soo shaqaysay xeerkan**, kuwaas oo dadaal badan geliyey, una waafajiyey **shuruucdeena Islaamiga ah**. Xeerkani waxa uu ka kooban yahay **55 bog**, kuwaas oo marka la koobo noqonaya **26 bog**, waana xeer laga soo guuriyey dalal hore ugu dhaqmi jiray caymiska, kadibna loo turjumay Af-Soomaali.

Arrintaasi waa sax, maadaama oo aynaan hore u lahayn **xeer caymis oo rasmi ah** oo dalka ka jiray. Sidaas darteed, in aynu ka soo qaadanno dalal hore ugu dhaqmay waa **lama huraan**. Waxaan ku waafaqsanahay dhammaan Mudanayaashii iga horreeyey in **xeerkani yahay xeer loo baahan yahay**, isla markaana **bulshadeennu aad iyo aad ugu baahan tahay**.

Xeerkani waxa uu yahay xeer runtii udhexeeya hay'adda caymiska qaranka iyo sharaa'iga ka shaqeeya caymiska oo ay ka mid yihiin shirkadaha caymiska, dilaaliinta siicayminta jaangoynta khasaaraha iyo lataliyaasha caymiska wax yaabahaasuu xeerkani khuseeyaa. Maaha xeer khuseeya haba yaraatee dadka la cayminayo, waxa kaloo runtii xeerkan ka buuxa qodobo badan oo aan hada qornayn oo odhonaya waxa loo samyn doonaa xeer-nidaamiye uu ku shaqeeyo xeerkani, waxaana haboon maadaama uu xeer kii ina horyaalo wax allaale iyo wixii uu xeer-nidaamiye uu leeyahay inay ku lifaaq naadaan halkan. laakiin xeer aynaan hada lifaaqiisii hayn oo aynaan garanayn hay'addu waxay ka yeeli doonto inaynu Ansixinaa waxan qabaa inaytahay hubsiimo la'aan markaa waa ina aynu iska

hubsanaa, waayo meelo badan oo ilaa 20meelood ayaad ku arkaysaa xeer-nidaamiye ayaa qeexi doona.

Waxa kaloo xeerkan ku jira awoodo ay hay'adda caymisku isticmaalayso sharaa'iga caymiska taas oo aan habkii ay u isticmaalayeen hadii ay ka joojinayaan ganacsiga iyo hadii kalaba aan qeexnayn. Markaa runtii waxad moodaa xeer aan dhamays tirnayn oo u baahan in aad iyo aad loo lafa guro habraacyadiisa oo dhan lasoo raaciyo isla markaana lagu daro wax yaabaha, aan halkan qeexnayn, ma wuxu noqonayaan caymis caafimaad, ma wuxu noqonayaa mid gaadiid ma wuxu noqonayaa guryaha kuma cada halkan. Maadaama hadii aynu xeerkii caymiska ansixinayno waa inuu iskugu jiraa hay'adda awoodaheeda iyo xidhiidhka ka dhaxeeye hay'adda caymiska iyo sharaa'iga ka shaqaynaya caymiska iyo dadka wax loo cayminayo ee iyagu iscayminaya inuu sadex daa qayboodba ka koobnaaday ahayd, si markaa aynu u fahano xuquuqda ay leeyihiin dadka caymiska gelayaa ay sharaa'iga ku leeyihiin waxaa soo dhan inay halkan ku qeexnaadaan bay ahayd, laakiin waxa keliya ina horyaalaa waxa weeyaan hay'addu sida ay umaamulayso sharaa'iga caymiska.

Waxaan soo jeedinayaa ; markaa runtii waxan qabaa inuuyahay xeer kala dhantaalan una baahan in la dhamaystiro oo hay'addu awoodaheeda iyo habraaca ay uraacaysaa la soo dhamaystiro sharaa'iga caymisku sida ay ula dhaqmayaan dadka ay wax u cayminayaan haday tahay qiimaheeda gaadiidka oo kale hadii lagu dhinto yaa bixinaya intee la bixinayaa? sidee loo bixinayaa? wax yaalahaa soo dhan inay ku jiraan bay ahayd. Runtii waxan qabaa guud ahaan waynu ubaahanahay xeerkii inagoo oo aan ka tegayn shareecada Islaamka oo ayna tahay wax kastoo aynu qabanayno inay ku qotomaan shareecada Islaamka hadana waa inaynu eegnaa baahida aynu uqabno xeerkan ma yahay mid dhamaystiran oo aynu halkan ka gudbi karno, waynu ubaahanahay laakiin ma dhamays tirnee hala dhamays tiro oo dib ha loogu noqodo.

**Md. Cabdikariin Maxamed Muxumed** **(10min 25sec): -** Bismilaahi raxmaani raxiim shirgudoonka Golaha wakiilada, Mudanayaasha Golaga Wakiilada, saxaafada iyo shaqaalaha Golaha aslaamu calaykum. Sida ay mudanayaashii iga horeeyay ay ka hadleen laba qodob uun baan dul istaagi doonaa oo aan kaga qayb gelayo dooda xeerka caymiska oo mudooyinkii u danbeeyay Golaha horyaalay, marka hore waxan umahad celinayaa gudidii gaarka ahayd ee tacabka soo gelisay ee lifaaqan ina hor yaala soo raaciyay iyo Guud ahaa wax-ka-beddelkii ay xeerka ku sameeyeenba inala wadaagay.

Mudanayaal labada qodob ee aan dul istaagayo waa qodobka 53aad oo ah waa jibinta adeega caymiska oo dhignaa sidan; "Hay'addu iyada oo xeer-nidaamiyeyaal adeeg sanaysa waxay amar ku bixin kartaa in caymisyada qaar ama dhamaan noocyada kaladuwan ee caymiska ay qaataan dadka ama shirkadaha deggan Somaliland in lala galo heshiis caymis,adeeg bixiyayaal maxalli ah" Gudidu waxay soo jeedisay in laga saaro qodobkaa dhamaanba ee xeerka qodobkaa 53aad ee waajibinaya adeega caymiska iyagoo ku

sababeeyay markii ay latashi lasameeyay culimada, masaladan waxay runtii ku tusinaysaa inay culimada ku kala duwan yihiin.

Markaa waxan soo jeedinyaa oo aan doodayda ku kabayaa in qodobkaa loo dhigo sidan; Waxa waa jiba caymiska gaadiidka ee khasaaraha uu gaadiidku geysto nooca loo yaqaan third-party oo aha maanta noca ugu badan ee shilalka geysta dhibaatooyinka uu bulshadeena uu kuhayo shilalku gaadiidku iyada oo hay'addu xeer-nidaamiye yaal adeegsanaysa, adeegyada kale caymisna waa mid furan, ama akhtiyaariya oo uu qofku geli karo, caymiska caafimaadka ha noqoto, ka maraakiibta ha noqoto, ama ka khataraha kale ee uu qofku dhigaal kasamaysan karo ha noqoto, hadba adeega shirkadahaasi ay bixinayaan ayay ku xidhan tahay.

Laakiin qodobkan caymiska in lawaajibiyo adeega caymis inay dadku galaan gaar ahaan khatraha gaadiidka, qofku khataraha uu geysto maanta bulshadeena dhibaatooyin badan ku haya waxaynu la soconaa in gaadiidku shilal badan oo naf iyo maalba leh soo gaadh siiyaan bulshadeena oo magtana ay reer kiisii ka bixinayaan qofka.

markaa waxaynu ka fikiraynaa maslaxadii umada in lawaajibiyo oo khasab lagaga dhigo qofka ka tuulo jooga iyo ka miyi jooga ka magaala joogaba qof dhib gaystay oo gaadiid kiisi uu dhib gaystay in qofkii miiga joogay magtii laga soo qaado iyadoo maanta qofkii miiga joogay ay abaartii saamaysay iyo cimiladii oo xoolihii ka baxeen in badan oo kamida noocan aynu maanta ka hadlaynaa oo uu xeer keenuna yahay isagoo si guud uu yahay noocii tijaariga ahaa iyo kii iskaashiga ku dhisanaa.

Hadana xeerkaynu qadanay waa kaa iskaashiga ku dhisan doodeenu maanta waxay taagan tahay miyaa lawaajibinayaa mise waa ikhtiyaari? oo qofka ayaa ikhtiyaar u leh. Inagoo qaadanay kaa tacaawiniga ah oo ka islaamku uu golyahay.

Runtii arintaa waa jibinta iyo qofku inuu ikhtiyaar u yeesho inuu galo iyo in kale culimada Islaamku waa ay ku kala duwan yihiin masaladani waa masalo diiniya hadana inta badan marka loo eego maslaxada umada iyo maanta halka uu dalkeenu uu marayo waxaynu u eegaynaa culimadu waxa ay ka yidhaahdeen waana lagu kala duwan yahay.

Waxa dhibka ugu badani uu ka haystaa umadeena, arintaasi dhaqaala bur-burkaa arintaa culayska bulshada kuhaya inuu qofku uu galo caymis gaadiid oo uu gaa diidkisa uu caymiyo oo khatarta uu gaysto iyo dhibka uu gaysto naf iyo maalba bale laga bixiyo waa mid bulshadeena maanta wax badan ka fududaynaysa, waana ka aynu maanta ubaahanahay in lawaajibiyo oo marxaladan xeerka lagu sheego. Caymisyada kale iyo qaybaha kale ee caymisyada waxan leeyahay wakhtiyo kale oo ay culays dhaqaale ay keenayso mustaqbalka wax laga beddelo xeerarka.

Marka laga tago arintaasi bulsho ee dhibta ku haysa arinta ganacsiga nidaamka maalgelineed ee dalkeenu waa mid kobcaya oo shir kadaha iyo dadka danaynaya inay Somaliland maal gashadaan qodobada ugu horeeya ee ay Ina waydiinayaan waxa weeye

dalkiina caymis maka jiraa? caymis shaqaynaya oo ay hantidooda, dhaqaalahooda iyo maalgelintooda ay ku aamini karaan haday gawaadhidooda tahay iyo hadii ay adeegyo kale noqotoba.

Markaa mustaqbalka hadii ay noqoto macaamulka aynu la leenahay aduunyada kale waa mid aad loo tebayo oo dalka kobociisa dhaqaale kuxidhan. Waxay nu ognahay mashruuca weyn ee Ber-bera corridor oo mustaqbalka la rajaynayo inay dakadaasi u adeegto wadamada jaarka waxa ay danaynayaan ganacsato badan oo is ticmaali doonta adeeg caymis gaar ahaan gaadiidka ka imanaysa wadanka aynu jaarka nahay ee Ethiopia oo laga yaabo kumanaan baabuur inay adeegsadaan iyo wadada corridor oo isku xidhaysa Somaliland iyo Ethiopia.

Arintaas oo mustaqbalka dhaw loo baahanyo in lahelo shirkado caymis oo shirkadahaa caymis ee kajira Ethiopia ay shirkadahoodu heshiis la gelikaraan wada shaqayni ay dhex mari karto oo ay ku xisaabtamayaan nooca ganacsi ay inala yeelanayaan waana dabar weyn oo rutii furfurnaantiisa qaybka noqonay in laga furo waana mid aynu soo dhaweynayno waana mid maslaxadeena ku xidhan.

Anigu qodobkaa sidaan u dhigay qodobkaa 13aad waa in lawaajibiyo baabuurta khatarta ay gaystaan inay caymis galaan si bulshada dhibkii haystay looga fududeeyo ee qofka miyiga joogay mawlaxada iyo dhaqaalihii laga qaadayay meesha ka baxo. Mustabalkana Cuqaasha iyo Salaadiinta iyo hogaanka dhaqanku qofkasta oo deegaanka ka soo jeeda waxay ku waajibind doonaan inuu Baabuurkiisa caymiyo qofka baabuurkiisa ku ganacsanya, qofka baabuurkiisa wata, markaa hay'adda ayaa loo baahanyahay qaabaka ay u kala horay siinayso ee adeegyadaasi iyo Baaburta Ganacsiga loo isticmaalayo ee Gobolada iyo Magaalooyinka u kala baxa, baabuurta gaarka ah, kuwa dawlada, kuwa kale ee hay'addaha caalamiga ah waa in ay noqotaa qaabka ay u bilaabayaan hawshaa baaxada leh ee sugaysa sidii ay u kala fudaydin lahaayeen markaa qodobkaa waxan soo jeedin lahaa in lawaajibiyo gaadiidku khatarta ay gaystaan oo runtii u baahan in arrintaas la fudaydiyo.

Qodobka 6aad farqadiisa 8aad oo u dhigan adeega caymis oo hoos imanaysa mabaadiida Asaasiga ah ee Xeerka waxa uu u dhigan yahay adeega Caymis waac adeeg u furan cidkasta oo leh awooda bixinta adeega caymiska sidaa darteed cid gaar ah kooto looguma xidhi karo, sidookale cidna laguma dirqiyi karo.

Markaa mar hadii lawaajibiyay oo aynu qayb kamida waa jibaad kii qaadanay in qodobkaa 6aad qaybtiisa danbe oo dhanaysa sidoo kale cidna laguma dir qiyi karo in iyadana qodobka noocaasa hadii la qaato qodobkaas, qodobada ka hor imanaya waajibinta ka reebaya in lala eego oo lala akhriyo intaa ayaan ku soo koobayaa doodaysa aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.

Gudoomiye Khaliif. Aad ayuu u mahadsanyhaya Md. Cabdikarin, waxaan siindoonaa Md. Maxamed Khadar, Laakin inta aanan siin waxaan rabaa in aan mudanayaasha mid xasuusiyo cida hawshan go'aan ka gaadhaysaa waa mudanayaasha halkan fadhiya, markaa

sidii cid cidkale ka hadlaysa ayaynaan u hadlin oo aynaan odhan waa in habraacyo la sameeyaa ee waa waxa lagaa qorayo una baahan in aad adigu ku soo kordhiso ee hadhaw codka galaya, Dipositka aad ka hadlaysaa waa waxa aad adigu qorayso ee aad adigu ka hadlayso ama percentage ku sheeg oo aad tidhaahdo Dipositka ama hantida uu haynayo ama uu qabanayo waa in percntageka noocaas ah laga hayaa ama waa in numberka noocaas ah laga hayaa oo aad sheegtaa.

Noocyada Caymiska waa in aan la odhan noocyadee ayay noqonayaane waa in la yidhaa noocaa iyo naacaa waa in ay noqdaan cida laga sugayaa waa adiga, waxaanan modaa in mudanayaashu eray isku mid ah uun laga hadlayo, qodobna waan baraarujinayaa shirkadaha caymiska furanayaa, iyada oo markii hore ay dawladu furan jirtay waa macaash-doon xaqiiqduna waa sidaas, markaa waa in aad looga warhayaa oo aad doodiina wax ku dhistaan, hadhawna go'aanadiina ku qaata waad mahadsantihiin.

**Md. Maxamed Khadar Daahir** **(9min 49sec): -** Bismilaali Raxmaani Raxiim, Wabihii Nastaciinu Calaa Umuuri Dunyaa wa Diin, Mudane gudoomiye iyi Mudanayaasha Aqalka Wakiilada ee Sharafta Badan waxaan marka hore Idinku Salaamayaa Asc, Mudane Gudoomiye waad mahad santahay fursadan aad isiisay, waxan jeclaan lahaa sidaa ay asxaabtaydii hore ka hadleen in aan woxogaa yar oo introduction ah aan ka horaysiiyo doodayda kabacdina laba qodob uun aan ku soo koobo.

Mudane gudoomiye arinta aynu maanta aynu ka hadlaynaa waxa weeye Insurance-ga, Insurance-gu sida aynu in badan maqalnay labo ayuu uqayb-samaa waa mid conventional iyo mid Islamic ah, mrkaa ka conventional-ka ah waa midka ay is ticmaalaan wadamada reer galbeedku eek u dhican wax yaalaha aan lahubin iyo interest-ka , kaasi waxa uu ka dhigan yahay in marwalba dhinac uun culaysku saar naanayo. Dhinac-na uu faa'idda yeelanyo, markaa hadii uu quruur foro badani uu ku jiro kaa waynu iska dhignay mana aynu qaadan.
Ka aynu isku waa faqnay ee xeer-keenuna aad u cadeeyay waa kan Islamic insurance-ga ama kan aynu unaqaano takaafulka. Takaafulku waa insurance ku dhisan heshiis dhinacyada wax wada gelayaa ay waxoodii isku darsanayaan meelna wada dhiganayaan khataraha yimaadana ay siwada jira marwalba cidaa ay ku timaado looga wada bixinayo, markaa far qigoodu waa sidaa

Hadaba mudane gudoomiye si uu insurance-gaasi uu laxaad u sheesho una hirgalo, horta waxa base u ah oo muhimtahay in laraaco qaybta 2aad farqada sadexaad oo runtii gudidii hore ee soo qaabeeyay xeerkan aadna ay ugu mahadsanyihiin sida ay usoo dhigeen wixii ka khaldan iyo wixii lagu dari doonana aan angu sixi doono, gebi ahaan ba waxay ku soo koobeen sadex qodob una dhigan sidan;

1. Shirkadaha ku hawlan adeegyada caymiska ama sii caymin gudaha dalka Somaliland ee doonaya ruqsad waa in ay layimaadaan shuruudaha ku faah-faahsan hab-raaca codsiga ee lagu jideeyay xeerka. Markaa habraacaa waxaynu ubaahanahay inaynu ogaano marka hore.

2. Shirkadaha hore ugu hawl gali jiray islamarkaana ubixin jiray adeegyo caymis waxa ay si lamid ah shirkadaha cusub u codsanyaan ruqsada si waafaqsan xeerkan.
3. Shirkad ama cidkasta oo bixisa adeeg caymis ama sii caymin iyada oo aan haysan ruqsad sharci ah si waa faqsan xeerka waxa ay mutay sanaysaa ganaax lacageed oo ka yarayn SL 50,000,000(konton milyan oo Somaliland shilling ah) ama xadhig ciqaabeed u dhigma.

Waxan aaminsanahay muddane guddoomiye xadhigaa ciqaabeed markaynu financial stationka ka hadlayno ganaax ciqaab in aanu yeelan, xadhig ciqaabeed wax kale ayuu mustaysan karaa ee waa in xadhigaa ciqaabeed laga daayo oo ganaax lacageed la dul saaro oo ganaaxaa lacageedna la sababeeyo, waxa lagu sababaynayana waxaan soo jeedin lahaa in Qodob 4aad in lagu daro qodobkaa soo odhanaya; "shirkad kasta oo ruqsad la siinayo waa in laga hayaa lacag dhiboosad ah", markaa lacagtaa dhiboosad ka ah ayaa hadii ay ganaaxyo mutaysato ayaa laga jari karayaa halkii xadhig loogu bedeli lahaa oo aan waajib ahayn ama aan mudnayn in laxidho.

Markaa lacagta Diposit-ka Maadaama oo waxan aynu kahadlaynaa ay tahay financial station, financial station kana had iyo jeer ha kala waaweynaadaane waa institution lacagtii umada gacanta ku haya, institution lacagtii umada gacata ku hayana qaranka guud ahaan iyo inaga gaar ahaan ceeb weyn bay inagu tahay in layi dhaahdo qofka rusqada dalbanaya wax dhiboosada lagamahayo taasi inaga ceeb bay inagu tahay markaa waa in halkaa dhiboosad wanaagsan laga qaadaa.

Waxan soo jeedin lahaa marka dhiboosadka in laga dhigo sadex (3milyan oo dollar) si hadii meeshaasi ay timaado dhibaato ka weyni oo aynu ugu bad-baadno oo waxeenii halkaa uga helno.

Qodobka 53aad mudane gudoomiye qodobkan gudidii gacanta ku haysay waa ay kasaareen qodobkaasi waxa uu khuseeyay in adeegan caymiska ma lawaajibin karaa mise lama waa jibin karo, Anigu waxan aamin sananahay mar hadii aynu isla waa faqnay insurance-ka aynu qaadanaynaa uu yahay midka takaafulka ah ama midka tacaawiniga ah oo basekiisu uu yahay mid islami ah waxan aamin sanahay in lawaajibiyaa inay banan tahay.

Sababta aan sidaa uleeyahay waxa weeyaan culimadeenii iskuma waafaqsana arintaa qayb kamida waxa ay leeyihiin waa lawaajibin karaa qayb kamidinina waxa ay leeyihiin lama waa jibin karo, halkaa marka ay marayso Golaha wakiilada iyo xilibaanadeeda ayay utaalaa inay arintaa si cilmiya u dul istaagaan oo u kuur galaan oo ay eegaan baahida meesha taala ma u qalantaa in waajib laga dhigo si loogu kala bad baado oo uu wadan ku ugu bad baado, mise waxaaba ah in aan waajib laga dhigin oo sidaasay dantu ku jirtaa.

Marka la eego sida ay arrimuhu yihiin, mushkiladda ugu weyn ee aynu qabnaa waa **arrimaha gaadiidka**. Gaadiidkuna waa halka ay ka yimaaddaan dhibaatooyinka ugu badan ee innaga soo gaadha. Sidaas awgeed, si aynu **ugu kala badbaadno**, deegaannaduna **ugu**

**kala neefsadaan**, isla markaana **mushkiladda looga dul qaado bulshada**, waxaan aaminsanahay in **gaadiidka laga dhigo mid qasab ku ah in la caymiyo**, si aynu innaguna ugu nasanno.

Daraasaddii ugu dambaysay ee soo baxday waxay muujinaysaa in **kharash ku dhow dhow dhawr iyo konton milyan oo dollar** uu sannad kasta ku baxo dhibaatooyinka gaadiidka iyo waxyeellada gaadha dadka marka la isku daro. Sidaas darteed, in aynu **dhowr iyo konton milyan oo dollar u galno caymis si iskaashi ah** waa arrin **inoo dan ah**, mana aha wax dhibaato inoo keenaya. Mudane Guddoomiye, sidaas ayaan soo jeedin lahaa in loo dhigo.

Ugu dambayn, Mudane Guddoomiye, waxaan dareemayaa in qodobada ay soo qoreen **Guddidii loo dhiibay xeerkan** aanay xoogga saarin **xidhiidhka ka dhexeeya bulshada iyo caymiyaha**. Sidaas awgeed, waxaan jeclaan lahaa in **qodob ka mid ah xeerka lagu daro**, kaas oo **faahfaahinaya xidhiidhka ka dhexeeya caymiyaha iyo la-caymiyaha.**

Sababtu waxa weeye, xeerka halkan yaalla waxa uu inta badan xoogga saaraya **hay'adaha (institutions) iyo shirkadaha caymiska**, halka **xidhiidhka labada dhinac ee caymiyaha iyo la-caymiyaha** aanu si cad uga muuqan. Sidaas darteed, ku darista qodobkan waan soo jeedinayaa. Aad iyo aad ayaad u mahadsan tahay, Mudane Guddoomiye. **ASC.**

**Md. Cali Jaamac Caraale (Cali-Qaran)** *(12 daqiiqo, 58 ilbiriqsi)* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha Golaha, Shaqaalaha Golaha, Marti-sharafta inagula sugan Golaha iyo Saxaafadda; **ASC**.

Ugu horrayn, waxaan halkan uga mahadcelinayaa **xubnihii Guddida** ee isu xilqaamay in ay inoo soo ururiyaan **Xeerkan Caymiska**, kaas oo muddo Golaha hor yaallay, isla markaana wakhti qaatay intii uu halkan soo gaadhayey.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, Xeerkan waxaan aaminsanahay in uu **qaranka u leeyahay faa'iidooyin badan**. Sidoo kale, waxa uu inaga nasinayaa **culayska magta iyo qoomaha**, kuwaas oo bulshada kala irdheeyey. Sida aynu wada ognahay, sannad kasta waxa dhaca **shilal gaadiid** oo naf iyo hanti lagu waayo.

Ma jiro qof dafiri kara in aynu maanta ku jirno **caymis dhaqan ku dhisan (caymis reeraysan)** oo qof walba lagu qasbo, haddii aanu u hoggaansaminna uu mutaysan karo ciqaab ka timaadda **cuqaasha iyo waxgaradka beelaha**. Sidaas awgeed, haddii bulshadu hesho **nidaam iyo xeerar haga caymiska dalka**, waxaa hubaal ah in laga kaaftoomi doono **dhiigbaxa dhaqaale** ee miyi iyo magaalo labadaba hadheeyey, gaar ahaan **magta**.

**Soo-jeedinnada Qodob-qodobka ah:**

**Qodobka 1aad:** Waxaan la qabaa soo-jeedinta Guddida ee ah in *"Qodobo Hordhac ah"* loo beddelo *"Qodobo Guud"*, sidoo kale in *"Xigasho"* loo beddelo *"Magaca Xeerka"*. Magaca xeerku ha ahaado sida uu inoogu yimi: **"Xeerka Shirkadaha Caymiska."**

**Qodobka 2aad:** Waxaan la qabaa in *"Fasiraadda"* loo beddelo *"Eray-bixin."*

**Qodobka 7aad:** Waxaan la qabaa in lagu daro qodobkan cusub ee ka kooban farqadaha (1aad, 2aad iyo 3aad), maadaama ay muhiim u yihiin xeerka.

**Qodobka 3aad:** Waxaan la qabaa in loo beddelo sida xeerka lagu soo gudbiyey, marka laga reebo farqadaha (2aad) iyo (3aad) ee u qornaa sidan:

- **(2)** Shirkadaha ku hawlan adeegyada caymis ama sii-caymin gudaha Somaliland ee doonaya ruqsad waa in ay la yimaaddaan shuruudaha ku faahfaahsan hab-raaca codsiga ee lagu jideeyey xeerkan.
  *Waxaan soo jeedinayaa* in lagu xiro **Qodobka 4aad** ee xeerka (hab-raaca codsiga ruqsadda), maadaama Guddidu ka boodeen Qodobka 4aad.
- **(3)** Qof ama shirkad bixisa adeeg caymis ama sii-caymin iyada oo aan haysan ruqsad sharci ah ha mutaysato **ganaax lacageed oo aan ka yarayn SL 50,000,000** ama **xadhig ciqaabeed.**
  *Waxaan soo jeedinayaa* in xadhigga loo cayimo **2 sano oo xadhig ah oo aan iib lahayn.**

**Qodobka 4aad:** Waxaan soo jeedinayaa in *"Codsiga Ruqsadda"* loo beddelo *"Hab-raaca Codsiga Ruqsadda."*

**Qodobka 5aad:** Waxaan raacsanahay in eray-bixinta lagu daayo *"Geedi-socodka Codsiga."* Farqadda 2aadna waxaan soo jeedinayaa in warbixinta Guddidu **si toos ah ugu soo gudbiso Guddoomiyaha Hay'adda**, halkii ay Hay'adda guud ahaan ugu gudbin lahayd.

Sidoo kale, waxaan la qabaa in lagu daro **farqad cusub (3aad)** oo u oggolaanaysa Hay'adda in ay la kaashato **xeel-dheerayaal madax-bannaan** oo aqoon gaar ah u leh hawlaha caymiska, heshiis muddo gaaban ahna lala galo.

**Qodobka 6aad:** Waxaan soo jeedinayaa in cinwaanka lagu daayo *"Ruqsad-siinta."* Sidoo kale, xarafka (A) ee farqadda 1aad ha noqdo mid ku xidhaya **bixinta ajuurada ku tilmaaman Qodobka 4aad**.

**Qodobka 7aad – Soo-jeedin iyo Wax-ka-beddel** Waxaan la qabaa soo-jeedinta Guddida ee **farqadda 1aad** ee Qodobka 7aad. Sidoo kale, waxaan wax-ka-beddel kooban ku sameeyey **farqadda 2aad, xarafka (B)** ee soo-jeedinta Guddida, oo hore u qornayd sidan:

*"Tix-raac caddaynaya in codsaduhu bixiyey khidmadda cusboonaysiinta ruqsadda oo dhan laba kun iyo shan boqol oo dollar ama qaddar u dhigma oo ah SL.SH."*

Waxaanan u habeeyey sidan:

**"Tix-raac caddaynaya in codsaduhu bixiyey khidmadda cusboonaysiinta ruqsadda oo dhan $2,500 (laba kun iyo shan boqol oo dollar) ama qaddar u dhigma oo ah lacagta Somaliland Shilling, iyada oo loo eegayo sarifka Baanka Dhexe ee maalintaas."**

**Qodobka 53aad – Soo-jeedin Wax-ka-beddel** Qodobkani wuxuu hadda u qoran yahay sidan: *"Hay'addu, iyada oo xeer-nidaamiyayaal adeegsanaysa, waxa ay amar ku bixin kartaa in caymisyada qaar ama dhammaan noocyada kala duwan ee caymisyada ay qaataan dadka ama shirkadaha deggan Somaliland in lala galo heshiiska caymis, adeeg-bixiyeyaal maxalli ah."*

Waxaan soo jeedinayaa in loo habeeyo sidan: **"Hay'addu, iyada oo adeegsanaysa xeer-nidaamiye, waxa ay waajib ka dhigaysaa caymiska gaadiidka kala duwan ee dalka. Dhammaan caymisyada kale waxa ay noqonayaan kuwo ikhtiyaar ah, cidna laguma amri doono lagumana dirqiyi doono."**

**Farqadaha ku lifaaqan:**

**(A)** Iyadoo tixgelinaysa muwaadiniinta dalka, sannadka koowaad ee dhaqangelinta xeerkan lama waajibin doono caymiska, si loo helo wakhti lagu wacyigeliyo bulshada laguna fahamsiiyo ahmiyadda caymiska.

**(B)** Iyadoo la ilaalinayo tartanka xorta ah, muwaadiniinta Somaliland laguma qasbi karo cidda ay caymiskooda ka qaadanayaan.

**Md. Axmed Cabdi Ibraahin (Timo-Jilic)** *(7 daqiiqo, 14 ilbiriqsi)*:- Qodobkan waxaan u arkaa mid muhiim ah. Marka ugu horreysa, in Guddida loo gudbiyo waa ka habboon tahay intii Golaha Weyni iman lahaa, si aragtida Mudanayaasha loo helo loona wada akhriyo. Aragtiyo badan oo sax ahaa oo qalab inoo noqon lahaa ayaa dib uga soo baxay wakhtigii hawsha la bilaabay.

Waxa jira sixitaanno badan oo lagu sameeyey xeerkan. Laba Guddiba way soo mareen, gaar ahaan Guddidii dambe oo soo jeedinno badan samaysay, Xildhibaan Cabdillaahna si qodob-qodob ah ayuu u taabtay.

Waxaan qabaa in xeerku wali leeyahay waxyaabo u hadhsan Mudanayaasha, isla markaana Xoghaynta iyo Guddoomiyuhu ay fursad u hayaan in wax lagu daro, wax laga dhimo, lana saxo.

Qodobka 53aad si gaar ah ayaa looga hadlay, waxaana aad u qurux badan in loo kala qaado **A, B iyo C**, maadaama Mudanayaal badani si qoto dheer uga hadleen. Waxa muhiim ah in uu waajibiyo **bixinta khasaaraha dhaca**, sidoo kale in shirkadaha iyo hay'adaha caalamiga ah lagu waajibiyo.

Arrinta **deposit-ka** ama **dhiboosidka** ayaan soo jeedinayaa in aan lagu goyn tiro go'an (50 milyan ama 3 milyan), balse loo beddelo **percentage**. Tusaale ahaan, haddii gaadiidku qaadaan celcelis ahaan $600 caymis ah, isla markaana dalka ay ka jiraan qiyaastii **100,000 gaadhi**, dakhliga sannadlaha ahi wuxuu noqonayaa ku dhowaad **$60 milyan**.

Waxaan soo jeedinayaa:

- Sannadka 1aad: 10%
- Sannadka 2aad: 7%
- Sannadaha xiga: 5%
- Hay'addu ha qaadato 2–3% oo ah khidmad ka mid ah dakhliga caymiska guud.

Shilalka sannadlaha ah waxay gaadhayaan **4,000 ilaa 8,000**, khasaare gaadhaya kumannaan gaadhi iyo in ka badan **100 naf**, sida ku cad warbixintii Booliska 2022. Lacagta la ururinayo waa in lagu shubaa **Baanka Qaranka**, lana sameeyaa laamo gobollada ah si loo hubiyo ammaan iyo hufnaan.

Sidoo kale, gaadiidka waxa loo kala saari karaa **alaab-qaad, dad-qaad iyo ciid-qaad**, waxaana xeerku oggolaan karaa **caymis caafimaad (Health Insurance)**, gaar ahaan shaqaalaha dawladda.

**Md. Bashiir Xuseen Xirsi***(3 daqiiqo, 32 ilbiriqsi):-* Xeerkan Caymisku waa xeer aad muhiim ugu ah bulshadeenna iyo qarankeennaba. Si kastaba ha ahaatee, waxa uu u muuqdaa mid si guud loo soo gudbiyey, iyadoo qodobo badan lagu sheegay in lagu qeexi doono **xeer-nidaamiye** aan weli lifaaqnayn. Halkaas ayaa dhibaato ka taagan tahay, waxaana habboon in lifaaqyada la soo raaciyo lana faahfaahiyo.

Arrinta labaad waa Qodobka 53aad. Waayo-aragnimadaydii Sucuudiga waxay muujisay in markii caymisku noqday ikhtiyaar, uu fashilmay, sababtoo ah dadkii ku biiri lahaa ayaa yaraaday, shirkadihiina ma dabooli karin khasaaraha. Ugu dambaynna, nidaamku wuu burburay, dadkiina dhib ayaa haystay.

Marka laga hadlayo **caymiska gaadiidka**, waxaan aaminsanahay in inkasta oo ay culimadu arrintan ku kala aragti duwan yihiin—taas oo run ah—haddana **culimo badan ay oggol yihiin in caymiska gaadiidku noqdo mid khasab ah**, isla markaana qof walba galo. Caymiska ganacsiga iyo kan caafimaadkuna iyagu waa halkooda.

Sucuudiga, hadda waxaan ognahay in **caymiskii ikhtiyaariga ahaa meesha laga saaray**, isla markaana **caymisku noqday mid khasab ah** oo qof walba bixinayo. Taasi waxay tusaale cad u tahay in waddamadii qaatey nidaamka ikhtiyaariga ah uu markii dambe u shaqayn waayay, sidaas darteedna looga gudbay.

**Qodobka 7aad** ee cusboonaysiinta shirkadaha caymiska wuxuu dhigaya in ruqsaddu shaqaynayso **hal sano oo keliya**, muddada ka dambaysana la cusboonaysiinayo, iyadoo **codsiga cusboonaysiinta la soo gudbinayo saddex bilood ka hor**. Anigu waxaan soo jeedinayaa in:

- **Muddada ruqsaddu noqoto laba (2) sano**,
- Si culayska looga yareeyo Hay'adda, loogana baxo cusboonaysiin sannadle ah,
- Lacagta liisanka ruqsadda laga qaadana noqoto **$4,000 USD**, lagana qaado **labadii sano mar**. Waad mahadsan tihiin, waan ka baxay.

**Md. Khadar Cali Xasan** (5 daqiiqo, 42 ilbiriqsi) Bismillaahi, Alxamdulillaah. Guddoomiyaha iyo Mudanayaasha sharafta badan, aad baan idiin salaamayaa.

Marka hore, waxaan la qabaa Mudanayaashii saaxiibbaday ee dooday, marka laga reebo meelaha ay ka jirto kala duwanaansho. Ugu horrayn, **xeerkan caymiska waa loo baahan yahay**, dalkuna baahi buu u qabaa. Waxaan bogaadinayaa shaqada ballaadhan ee ay qabatay **Guddidii aynu u dirnay**.

Diintu waxay tidhaahdaa: *xalaashu waa caddahay, xaaraantuna waa caddahay, waxa u dhexeeyana waa shubuhaad*. Sidaas awgeed, haddii uu jiro khilaaf ku jira **Qodobka 53aad** ee Guddidu ka saartay (kan caymiska khasabka ka dhigayay), anigu waxaan taageersanahay **in loo daayo ikhtiyaari**, maadaama uu yahay **tacaawun**; tacaawun waajib ahna ma jiro—tacaawunku waa ikhtiyaari.

Xeerkani wuxuu u muuqdaa mid wax ka beddelaya **dhaqankeena**, gaar ahaan arrimaha **magta**. Sida doodihii Mudanayaashii hore laga fahmay, shirkaduhu waxay ku shaqaynayaan **xeer-nidaamiye ka farcamaya**, kaas oo laga yaabo inuu beddelo qiimihii magta ee dhaqanka ahaa. Arrintan waxay u baahan tahay **la-tashi dhaqan** oo lala yeesho **Wasaaradda Arrimaha Gudaha** iyo **Cuqaasha dalka**, maadaama ay saamayn ku leedahay dhaqanka.

Qodob kale oo muhiim ah waa **xoojinta hay'adaha maaliyadeed**. Haddii shirkad caymis kacdo ama fashilanto, **xuquuqda dadka laga ururiyey waa in la hubiyaa**. Haddii **dhigaalka (deposit-ka)** shirkaddu aanu daboolin khasaaraha, waxa ka dhalan karta **mushkilad bulsho** ka weyn middii la doonayay in la daweeyo. Sidaas darteed, **kobcinta hay'adaha maaliyadeed** waa arrin aad u muhiim ah.

Waxa kale oo jirta halis ah in **shirkadaha caymiska ay is-heshiiyaan**, sida ka dhacday shirkadaha shidaalka, oo qiimuhu noqday mid go'an. Haddii shirkadaha caymisku is-raacaan oo ay **kor u qaadaan premium-ka** (qaadhaanka dadka laga qaadayo), xeerku ma xadidayo qiimaha; taasina waa arrin u baahan tixgelin gaar ah.

Qodobadan oo dhammi waa **walaacyo ku jira xeerkan**. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, xeerkani wuxuu noqon karaa **xeer miisaan iyo sumcad u noqda Golaha Wakiillada**, maadaama uu yahay xeer maaliyadeed oo **si toos ah Madaxweynaha ugu gudbaya**; marka uu Madaxweynaha saxeexona, wuu dhaqan-gelayaa. Sidaas awgeed, haddii bulshadu ka qayliso xeerkan marka uu dhaqan galo, waxa ay **saamayn taban** ku yeelan kartaa Golaha—Alle ha inaga dhawree.

Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa in **xeerkan si qoto dheer loo eego**, daraasad ballaadhan lagu sameeyo, dhinacyo badan—gaar ahaan **dhaqanka**—laga eego, ka dibna go'aan laga qaato. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Cumar Jaamac Faarax** (4 daqiiqo, 17 ilbiriqsi) Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, **Xeerka Caymiska Qaranku waa xeer waajib ah**; dunida oo dhan—Muslim iyo aan Muslim ahaynba—waa la adeegsadaa.

**Qodobka 8aad**, Farqaddiisa 3aad, wuxuu dhigayaa: *"Haddii shirkad ruqsad loo siiyay adeeg caymis si waafaqsan xeerka ay caydhowdo ama kacdo, isla markaana lagu leeyahay hanti, waxa loo raacayaa xeerarka kale ee khuseeya."* Waxaan soo jeedinayaa in **shirkadda caymiska lafteeda lagu raaco**, si aanay mas'uuliyaddu u noqon mid muhmal ah; **liability-guna** ha ku dhacdo shirkadda is-diiwaangelisay ee lacagta ururisay.

Sidoo kale, shirkad kasta oo caymis ah waa inay **dhigataa dhigaal (deposit)** Bangiga Dhexe, si haddii ay kacdo ama baxdo, magdhawga looga jaro dhigaalkaas. **Dhigaalkaasi yuusan ka yaraan $2–$3 milyan USD** shirkad kasta.

**Qodobka 7aad** ee cusboonaysiinta ruqsadda, maadaama aynu leenahay **lacag qaran**, waxaan soo jeedinayaa in **lacagta lagu xuso Somaliland Shilling**, sida **20 milyan ama 30 milyan SL.SH**, halkii dollar lagu qiimayn lahaa.

**Qodobka 57aad**, anigu waxaan qabaa in **caymisku noqdo mid khasab ah** oo aan ku koobnaan gaadiidka oo keliya; balse uu gaadho **caafimaadka, guryaha, iyo gaadiidka kala duwan**. Marka qof safar galayo, fiisaha waxa lagu weydiiyaa caymis; sidaas darteed, **caymisku ha noqdo mid khasab ah**, iyadoo qaybihiisa kala duwan la kala qeexayo.

Sidoo kale, **caymiska looma xidhayo cid gaar ah**; shirkadaha ha lagu kala saaro **awooddooda maalgashi iyo dhigaalkooda**, si ay **kalsooni** ugu abuuraan shacabka. Intaas ayaan kaga baxayaa. **WSC.**

**Md. Xasan Saleebaan Dhuxul (Laabsaalax)** (12 daqiiqo, 23 ilbiriqsi) Mudanayaal iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiillada, dhammaantiin **ASC**. Ilaahay baa mahad leh. Waa muhiim in **Xeerkan si ballaadhan loo lafa-guro** maadaama dooddiisu weli socoto. Su'aashu waxay tahay: **maxaa laga faa'iidayaa, dadkeennu ma u qalmaa, maxayse ku kala duwan yihiin Caymiska Islaamiga ah iyo kan reer Galbeedka?**

Mudane Guddoomiye, intaanan dooddayda u gelin, waxaan doonayaa inaan si kooban dulmar uga bixiyo taariikhda caymiska. Markii ugu horraysay ee caymis laga hirgeliyo dunida waxay ahayd 1666, xilligii dabkii ka kacay suuqa London. Nooca caymiskaasi wuxuu ahaa caymis tijaariga ah (macaash-doon). Balse dunida Islaamka, 1962, shir weyn oo ay Culimada Muslimiintu ku yeesheen magaalada Dimishiq ee dalka Suuriya ayay ka soo saareen fatwo ay ku kala saarayaan caymiska ay Shareecadu oggolaatay iyo ka aanay oggolaan.

Shirweynihii labaad ee Culimada Islaamka oo ka dhacay Qaahira 1964, waxa lagu caddeeyey in Caymiska Tacaawuniga ah uu bannaan yahay. Sannadkii 1977, Bangiga Boqor Faysal ayaa bilaabay Caymiska Islaamiga ah, waxaana laga hirgeliyey dalka Suudaan. Maanta, caymiska Islaamiga ah waxa ku shaqeeya 57 dal oo Muslimiin ah. Sidaas darteed, Mudanayaal, dunida waxa ka jira laba nooc oo caymis ah: mid Islaami ah iyo mid ka shaqeeya waddamada reer galbeedka oo la yidhaahdo conventional insurance.

Labadaas caymis waxa lagu kala gartaa caymis tijaar ah iyo caymis takaafuli ah. Farqiga u dhexeeya labadan nooc waxa lagu soo koobi karaa sidan: caymiska conventional-ka ah ama tijaariga ah ee waddamada aan Islaamka ahayn ku dhaqmaan waxa sal u ah ribo (interest), khatarta ama khasaaruhuna waxa uu saaran yahay hal dhinac oo ah shirkadda, mana jirto lacag dib loogu celiyo dadkii caymiska ku jiray. Halka caymiska Islaamiga ah uu sal u yahay tabaruc (contribution), khatartana si wadajir ah loo qaybsado.

Haddaba, Mudanayaal, mabda'iyan caymiska Islaamiga ah waxa looga baahan yahay toddoba qodob oo ay tahay inuu la jaanqaado. Qodobadaasi waa: in shirkadda caymiska laga hayo lacag dhigaal ah (deposit); in khasaaraha ama khatarta ay wadaagaan caymiyaha iyo la-caymiyaha, maadaama ujeeddadu tahay iskaashi bulsho; in khidmada ay qaadanayso shirkadda wax cayminaysa ay caddaato; in si sanadle ah loo soo bandhigo xisaab-xidhka shirkadda caymiska; in la isla ogyahay nooca caymiska iyo tirada dadka ku jira; in kharashka odoroska (qiyaasta) ee lagu maaraynayo khataraha la qeexo; iyo in habka loo qaybinayo lacagaha ku soo hadha sanduuqa shirkadda caymiska ee dadka dib loogu qaybinayo la isla yaqaan.

Markay sidaas tahay, Mudanayaal, xeerkani midkoodna si cad uma sheegin. Dalkeena iyo dadkeennuna si weyn ayay ugu baahan yihiin xeerkan, annagana shaqo badan ayuu inooga baahan yahay. Xeerkani wuxuu ka hadlayaa ruqsad-siin iyo ruqsad-kala-noqosho, balse ma caddaynayo waajibaadka ka dhexeeya shirkadaha caymiska iyo muwaadiniinta la cayminayo. Sida ka muuqata xeerka dhexdiisa, waxa uu qodobbo badan ku daadejinayaa xeer-nidaamiye.

Marka la is weydiiyo xeer-nidaamiye waxa uu yahay, xeer-nidaamiye waxa lagu qoraa faahfaahinta fulinta xeerka iyo sida loogu dhaqmayo, laakiin xeer-nidaamiye waxba ma

xubin oo ka mid ah Guddida Agaasimayaasha ay yeelato aqoon ku saabsan Islamic Finance waajibiyo. Hase yeeshee, waxa muuqata in xeerkani waajibinno badan oo muhiim ah u wareejiyey xeer-nidaamiye, taas oo dhibaato ah.

Caymiska dhaqameedka Soomaalidu inta badan wuxuu ku dhisan yahay hab reernimo, waxaana ilaa maanta dhaqan u ah in intii isku hayb ahi magta wada bixiyaan. Caymiska casriga ahi se wuxuu abuuraa tol ka ballaadhan haybta, waxaana wada galaya kumannaan qof oo aan is aqoon, balse shirkad ayaa isu xidhaysa.

Markaan qodobada xeerka u gudo galo, Mudane Guddoomiye, waxaan soo qadimayaa qodobka 53aad, waxaana aaminsanahay in xeerkani faa'iido iyo macne yeelanayn haddii aan la waajibin caymiska gaadiidka, maadaama khasaarihiisu si toos ah ummadda u saameeyo. Caymiska caafimaadka ikhtiyaari wuu noqon karaa, balse caymiska gaadiidka waxaan ku adkaynayaa in khasab laga dhigo, sida ay soo jeediyeen Mudanayaashii ka saaray ikhtiyaariga.

**Qodobka 1aad** cinwaankiisa oo u qoran "Xigasho" waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo "Magaca Xeerka", sida lifaaqa Guddidu soo jeedisay. Xeerkani ma laha qodobbadii asaasiga ahaa sida ujeeddada xeerka, mabaadi'diisa, ama xadka adeegsiga xeerka, kuwaas oo xeer kasta sal u ah in la fahmo marka hore, loona baahnaa inay noqdaan qodobada 3aad iyo 4aad, kana horreeyaan dhammaan qodobada kale marka laga reebo magaca iyo fasiraadda.

**Qodobka 2aad** ee fasiraadda waxa ku jira ereyo badan oo u baahan in la saxo, iyo ereyo kale oo ka maqan oo ay tahay in lagu daro. Qodobka 7aad ee ka hadlaya cusboonaysiinta ruqsadda shirkadaha caymiska, farqaddiisa 1aad oo dhigaysa in ruqsaddu noqoto hal sano, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo laba sano. Isla qodobkaas, farqaddiisa 2aad, xarafka (A), oo waajibinaya in sannad kasta laga qaado $3,000,000, waxaan soo jeedinayaa in lacagtaasi laga dhimo oo laga dhigo $2,000,000.

**Qodobka 8aad** ee wax-ka-beddelidda, hakinta iyo laalidda ruqsadda, farqaddiisa 1aad, xarafka (A), oo odhanaya "haddii danta guud sidaa ku jirto", waxaan soo jeedinayaa in laga saaro, maadaama danta guud lagu ilaalinayo sharciga xeerkan laftiisa. Halkii laga dhigi lahaa in la yidhaahdo: haddii uu jabiyo mid ka mid ah shuruudihii uu ruqsadda ku helay ama u hoggaansami waayo dabaqidda xeerkan. Isla qodobkaas, farqadda 1aad, xarafka (H), oo u qoran "ay shirkaddu joojisay inay u qalanto", waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo: ay shirkaddu hoos uga dhacdo heerkii ay shirkad caymis ku sii ahaan lahayd si waafaqsan xeerkan.

**Qodobka 12aad, farqaddiisa 2aad,** oo oggolaanaya in shirkaddu maamusho lacagaha dheeraadka ah ee sanduuqa khatarta, farqaddaasi waxay khatar ku tahay ilaalinta lacagaha, sidaas darteedna waxay u baahan tahay dib-u-eegis. Qodobka 36aad, farqaddiisa 2aad, oo siinaya Hay'adda lix bilood go'aanka isku-biiridda iyo wareejinta, waxaan soo jeedinayaa in muddadaasi laga dhigo laba bilood.

**Qodobka 46aad** ee qorshayaasha soo-kabashada, ujeeddadiisu ma cadda, sidoo kale waxa uu ka kooban yahay qodobo isku-noq-noqonaya. Qodobka 49aad ee gabo-gabeynta ruqsad-haysta, aragtidayda wuxuu u baahan yahay dib-u-eegis buuxda, maadaama uusan la jaanqaadayn qodobka 8aad ee hakinta iyo laalidda ruqsadda. Sidoo kale, haddii shirkaddu ku qanci waydo kala-noqoshada ruqsaddeeda, rafcaankeeda maxkamadeed waa in si cad loo waafajiyo farqadda 3aad ee qodobka 8aad.

Sidoo kale, Mudane Guddoomiye, guud ahaan waxaan soo jeedinayaa in lacagta dhigaalka (deposit) ay noqoto lacag dhan laba milyan oo doollar ($2,000,000 USD).

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa khidmad. Markaan leeyahay khidmad, kama hadlayo lacagta laga qaadayo dadka la cayminayo, balse waxaan ula jeedaa in shirkaddu yeelato khidmad go'an oo ah 20% ka mid ah lacagta soo gasha. Qodobkaas ayaan ku soo gabo-gabaynayaa soo jeedintayda, qodobadii kalena waxaan taageerayaa Xildhibaanadii iga horreeyay ee kala ahaa Mustafe, Maxamed Khaddar, Maxamed Jaamac iyo Cabdillaahi Muuse. Aniguna waxaan kaga noqdaa in aanan wax intaa dhaafsiisan ku dari doonin. Intaas ayaan kaga baxayaa.

**Guddoomiye Khaliif:** Wuu mahadsan yahay Xildhibaan Xasan. Waxa kale oo aan Mudanayaasha u soo gudbinayaa in cid kasta oo ka mid ahayd guddidii gaarka ahayd (ad hoc committee) ee xeerkan ka soo shaqaysay, ama cid u aragta inay leedahay aragti dheeraad ah oo doodda hore uga qayb qaadatay, ay soo gudbin karaan qoraallo diyaarsan. Haddaba, waxaan doodda siinayaa Mudane Cabdinaasir Yuusuf Cismaan. Mudane, ku soo dhawow.

**Mudane Cabdinaasir Yuusuf Cismaan (Qodox):** Marka hore waxaan salaamayaa Guddoomiyaha iyo xubnaha Xildhibaanada Golaha. Waxaan halkan uga mahadnaqayaa guddidii loo saaray xeerkan oo runtii wakhti badan gelisay isla markaana si faahfaahsan u soo diyaarisay.

Anigu waxaan jeclaan lahaa inaan wax ka tilmaamo, maadaama xeerkani uu muhiimad weyn u leeyahay qaranka iyo dadkeenaba, ummadduna ay maanta baahi weyn u qabto, isla markaana uu meelo badan khuseeyo, dad badanna ay isha ku hayaan xeerkan oo si weyn loo danaynayo. Sidaa darteed, waxaan jeclaan lahaa inaan aragtidayda ka dhiibto qodobada xeerkan.

**Qodobka 1aad**, Mudane Guddoomiye, maadaama xeerku markii hore lahaa magac u gaar ah sida uu qeexayo qodobkan oo ahaa "Shirkadaha Caymiska" oo keliya, waxaan la qabaa oo aan taageerayaa soo jeedintii guddidii gaarka ahayd ee ahayd in xeerka loo bixiyo "Xeerka Shirkadaha Caymiska Islaamiga ah". Markaan sidaas leeyahay, waxaan ula jeedaa in aynu qaadanay caymiska Islaamiga ah, isla markaana meesha ka baxayo kii tijaariga ahaa ama conventional-ka ahaa. Sidaa darteed, qodobkaas waan ayidayaa, maadaama aynu nahay dad Muslimiin ah oo diinta Islaamku mar walba noo tahay marjac aynu ku noqono, waana inaynu dhammaan xeerarkeena ku dabaqnaa shareecada Islaamka.

**Qodobka 2aad**, eray-bixinta "Shirkad Caymis", waxa lagu qeexay in ay tahay shirkad u taagan maareynta hantida caymislayaasha, iyada oo ku qaadanaysa khidmad lagu heshiiyey. Halkan, waxaan jeclaan lahaa in khidmadaasi noqoto mid cad, anigoo soo jeedinaya in khidmadaasi aanay ka badnaan, tusaale ahaan, 12%, si aanay u dhicin in hanti umadeed la lunsado.

**Qodobka 3aad** ee xadka adeegsiga xeerka oo ka kooban saddex farqadood, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro farqad afraad oo u dhiganta sidan: shirkadaha caymiska ee aan waddaniga ahayn ee dalka ka hawl-galaya waa inay raacaan oo ku dhaqmaan xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya caymiska ee dalka ka dhaqan-galay. Sababta oo ah qodobada hore waxay ka hadlayaan shirkadaha caymiska ee maxalliga ah iyo la-caymiyaha, halka shirkadaha shisheeye sida kuwa Itoobiya, gaar ahaan kuwa ka hawl-gala Berbera Corridor iyo Dekedda Berbera, ay isticmaalayaan gaadiid u baahan caymis.

**Qodobka 5aad** ee ujeeddooyinka xeerka oo ka kooban shan farqadood, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro saddex farqadood oo kale si ay u noqdaan siddeed farqadood. Farqadda lixaad waxaan soo jeedinayaa inay noqoto mid tilmaamaysa in xeerkani abuuro iskaashi bulsho oo baaxad leh, kana caawiya in culaysyo badan oo bulshada saaran la khafiifiyo, gaar ahaan kuwa ka dhasha magta iyo shilalka gaadiidka. Farqadda toddobaadna waxaan soo jeedinayaa in lagu daro in xeerkani gacan ka geysanayo yaraynta qabyaaladda, maadaama uu bixinayo xal casri ah oo beddelaya ku tiirsanaanta reer iyo hayb. Sidoo kale, xeerkani wuxuu suurtagelinayaa in dalkeenu la jaanqaado ganacsiga caalamiga ah, maadaama dunida meel kasta oo ganacsi la galo caymis laga doonayo, caymis la'aantuna ay inaga hor istaagtay fursado badan.

**Qodobka 8aad** ee masuuliyadda shirkadaha caymiska, farqaddiisa 3aad oo sheegaysa in haddii shirkad caymis caydhowdo ama kacdo loo raacayo xeerarka kale ee khuseeya, waxaan soo jeedinayaa in shirkadda lafteeda si toos ah loo raaco si hantida ummadda aanay cidlo ugu dhicin, isla markaana shirkad aanay ganacsi ka shaqaysan kadibna si fudud u baxsan.

**Qodobka 9aad** ee shuruudaha ruqsad-siinta, farqaddiisa 3aad oo dhigaya ganaax dhan 50,000,000 SL Shilling, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo 80,000,000 SL Shilling, maadaama shirkadahani ay maamulayaan hanti umadeed, isla markaana cid kasta oo xeerka baal-marta ay mudan tahay ganaax culus.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in lagu daro farqad cusub oo waajibinaysa in shirkad kasta oo cusub laga hayo lacag dhigaal ah (deposit), maadaama haddii shirkad kacdo ama baxdo ay lagama maarmaan tahay in ay jirto hanti lagu damaanad qaado xuquuqda dadka. Sida bangiyada ganacsiga looga hayo dhigaal Bangiga Dhexe, sidaas oo kale shirkadaha caymiska waa in laga hayo dhigaal adag. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in dhigaalkaasi noqdo laba milyan oo doollar ($2,000,000 USD).

**Qodobka 12aad** ee cusboonaysiinta ruqsadda, xeerku wuxuu dhigaya in ruqsaddu hal sano shaqayso, codsigeedana la soo gudbiyo saddex bilood ka hor. Waxaan taageerayaa soo jeedintii hore ee ahayd in ruqsadda laga dhigo laba sano, codsigana la soo gudbiyo laba bilood ka hor, si shirkaduhu u helaan xasillooni hawleed iyo mid maaliyadeed, hay'adduna aanay culays sannadle ah ku jirin.

Sidoo kale, halka xeerku dhigayo in cusboonaysiinta ruqsaddu noqoto $3,000 USD, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo $5,000 USD.

**Qodobka 8aad** ee laalista iyo hakinta ruqsadda, farqaddiisa 2aad xarafka (J), halka muddada sagaashanka maalmood ah, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo lixdan (60) maalmood.

**Qodobka 13aad – Qaab-dhismeedka maamul ee shirkadda** Halkan waxa lagu qeexayaa in shirkad waliba yeelan doonto qaab-dhismeed maamul oo kala duwan, waxaana ugu sarreeya Guddiga Agaasimayaasha (Board of Directors). Haddaba, waxaan soo jeedinayaa, maadaama ay lagama maarmaan tahay in la helo dad leh hanti iyo aaminnimo, in xubnaha maamulka sare ee shirkadda (board-ka) ay noqdaan dad ku sifoobay aaminnimo, isla markaana lagu xusho aqoontooda, ugu yaraan heer jaamacadeed.

**Qodobka 27aad – Jaangoynta khasaaraha ama shil-cabirrada** Waxaan ku raacsanahay oo aan si buuxda u ayidayaa soo jeedintii Guddida. Sidoo kale, farqadda 2aad ee Guddidu soo jeedisay, waxaan ku taageerayaa in xadhigga lagu daro kharash maaliyadeed oo u dhiganta 3,000,000 SL Shilling, si looga hortago wax is-daba marin ah ama in dadka cabbiraya khasaaraha si gaar ah loola heshiiyo.

**Qodobka 36aad – Go'aannada Hay'adda ee isku-biiridda iyo wareejinta** Farqadda 2aad ee qodobkan oo dhigaysa in Hay'addu go'aan ka gaadho muddo lix bilood ah, waxaan soo jeedinayaa in muddadaas laga dhigo afar (4) bilood, si shirkadaha caymiska u helaan go'aan degdeg ah oo ku saabsan isku-biirid ama wareejin.

**Qodobka 53aad** Ugu dambayn, Mudane Guddoomiye, diinteennu waxay ina siisay tusaalayaal cad. Nabigu (CSW) wuxuu yidhi: "Al-xalaalu bayyin, wal-xaraamu bayyin, wa baynahumaa umuurun mushtabihaat."

**Qodobka 53aad**, anigu si buuxda ayaan u ayidayaa, isla markaana si adag u taageerayaa soo jeedintii Guddida. Sababtu waa in xeerkani uu ka hadlayo dhammaan noocyada caymiska guud ahaan, mana kala saarayo caymis gaar ah sida caymiska gaadiidka oo keliya. Haddii aynu doonayno in gaadiidka oo kaliya la waajibiyo, markaa xeer gaar ah oo ah Xeerka Caymiska Gaadiidka ayay ahayd in la sameeyo.

Maadaama uu xeerkani koobsanayo dhammaan caymisyada, isla markaana culimadu isku khilaafsan yihiin arrinta waajibinta, waxaan la qabaa soo jeedinta Guddida ee ah in Qodobka 53aad laga dhigo sida ay u soo jeediyeen, oo caymiska laga dhigo mid ikhtiyaari ah; qofkii doonaya ha galo, kii aan doonayna yaan lagu waajibin. Tani waa aragtida ay u

badan yihiin culimada, waana mid ku habboon marxaladda aynu ku jirno, maadaama Goleheenna il gaar ah lagu hayo, isla markaana ay waajib tahay in wixii diinta ka hor imanaya si taxaddar leh looga fogaado loona reebo.

**Qodobka 68aad – Muddada kala guurka** Halka qodobkani dhigayo lix bilood, waxaan soo jeedinayaa in muddada kala guurka laga dhigo siddeed (8) bilood.

**Gunaanad soo jeedin** Waxaan ku soo gabo-gabeynayaa dhowr soo jeedin, maadaama xeerkani yahay mid aad u muhiim ah:

- Xeerkani si cad uma qeexayo habka loo xallinayo khilaafaadka, gaar ahaan haddii shirkadaha caymiska dhexdooda ama shirkad iyo muwaadin khilaaf ka dhex dhasho. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro qodob qeexaya habka iyo nidaamka lagu xallinayo khilaafaadka.
- Sidoo kale, waxaan soo jeedinayaa in Xeerka Hay'adda Caymiska Qaranka la akhriyo lana barbar dhigo xeerkan ka hor inta aan la ansixin.
- Meelo badan ayuu xeerkani tilmaamayaa in arrimo lagu xallin doono xeer-nidaamiye, sidaas awgeed waxaan soo jeedinayaa in meelahaas si gaar ah dib loogu eego loona habeeyo, lana xuso qodobada ay khasab tahay in xeerka laftiisa lagu caddeeyo, halkii dhammaantood xeer-nidaamiye loo daadi lahaa. Waad mahadsan tihiin. WSC.

## Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 4aad, Fadhigii 12aad

**Wakhtiga uu furma:** 09:27 AM
**Taariikhda:** Salaasa, 11 October 2022

### **Guddoonka:** Md. Cabdirisaaq Khaliid Axmed

### **Quraanka:** Md. Sh. Axmed Dayib

### **Ajandaha Fadhiga:-** Maalinta 2aad ee Doodda Xeerka Shirkadaha Caymiska.

Guddoomiye Cabdirisaaq Khaliif Axmed: Mudanayaal, fadhigu wuu inoo furan yahay, waxaana marka hore ku furanaynaa Quraanka Kariimka ah oo uu inoo akhriyo Sh. Axmed Dayib Aadan. Mudanayaal, halkaas ayaynu ka sii wadi doonaa dooddii Xeerka Caymiska, waxaana ugu horreyn siinayaa Md. Maxamuud Saalax oo shalay, isaga oo hadalka wata, aynu ka joojinay. Ku soo dhawoow, Mudane.

**Md. Maxamuud Saalax Cabdi (5min, 36sec):** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Asc. Shir-guddoonka iyo Xildhibaanada, salaam ka dib, waxa aynu ka hadlaynay doodda Xeerka Caymiska. Waxaanan jecelahay inaan ku bilaabo magaca xeerka iyo waxa uu ka hadlayo, kaas oo ah mid Takaafulli ama Ijtimaaci ah. Sida lifaaqa Guddida iyo xeerka laftiisa ka muuqata, meelo badan ayaa kaga qoran erayga "ganacsi", halka xagga hore lagu xusay Ijtimaaci ama caymis Islaami ah. Sida ka muuqata, waxaad mooddaa in mar walba ay soo noqnoqonayso kalmadda ganacsi. Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa in erayga ganacsi laga saaro, laguna beddelo caymis Ijtimaaci ah meel kasta oo uu ku jiro.

**Qodobka 12aad** farqaddiisa 2aad waxa ku jira sanduuqa khatarta caymiska, sidoo kale **Qodobka 57aad** waxa ku soo noqday sanduuqa magdhawga caymislayaasha. Labaduba kuma jiraan xagga hore ee eray-bixinta xeerka. Sidaa darteed, waa in la caddeeyaa in ay isku mid yihiin iyo in kale, iyo waxa ay kala turjumayaan.

**Qodobka 14aad farqaddiisa 2aad** xarafkiisa (A) waxa uu sheegayaa in qof kasta oo ka mid noqonaya Guddiga Agaasimayaasha ee shirkadda caymiska uu noqonayo shakhsi fayaw oo ku habboon shaqada. Si si cad loo fahmo, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro "maskax ahaan fayaw ama dhimir ahaan fayaw".

**Qodobka 49aad farqaddiisa 3aad** oo sheegaysa gaba-gabaynta ruqsad-haystayaasha in lagu caddeyn doono xeer-nidaamiye, waxaan soo jeedinayaa in laga saaro, isla markaana xeerku si cad u qeexo sida uu tilmaamayo qodobka ka dambeeya, maadaama halkaas ay ku caddahay waxa qofku ku waayi karo ruqsaddiisa.

**Qodobka 53aad** ee sheegaya in hay'addu adeegsan karto xeer-nidaamiyayaal ay caymiska kaga dhigi karto mid qasab ah, waxaan qabaa in arrintaasi ay tahay mid dooddeennu ku soo noqnoqotay, isla markaana culimo badan ay aragtiyo kala duwan ka bixiyeen. Qawaacidda Islaamkuna way caddeeyeen in wixii faa'iido keena la qaato, wixii dhib keenaana laga fogaado. Sidaa darteed, waxaan qabaa in caymiska gaadiidka lagu koobo

wixii uu dhib gaysto, oo aan lagu darin wixii isaga loo gaysto, maadaama gaadiidku sii kordhayo dhibtiisuna sii badanayso, lagama maarmaanna ay tahay in xal loo helo. Caymisyada kale ee jira waa in ay noqdaan kuwo ikhtiyaari ah, oo aan laga dhigin kuwo qasab ah, maadaama duruufahoodu ka duwan yihiin tan gaadiidka.

**Md. Cabdiqani Maxamed Aadan (3min, 25sec):** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Qodobka 2aad ee fasiraadda xeerka waxa ku qoran laba eray oo iska hor imanaya, kuwaas oo ah "Wakiil Dilaal" iyo "Wakiil Shirkad Caymis". Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa in erayga wakiil meesha laga saaro, maadaama ay noqonayso meel interest laga raadin karo.

Qodobka 59aad oo ka hadlaya adeegsiga erayga caymis si loo qabto ganacsi caymis, iyadoo loo eegayo qaybta 2aad iyo dhaafitaan kasta oo lagu caddeeyey xeer-nidaamiye, waxaan soo jeedinayaa in xeer-nidaamiyayaasha lagu sheegay xeerkan lagu soo lifaaqo inta aan xeerka la ansixin, waayo waxa aad mooddaa in xeer-nidaamiyayaashu ay baabi'inayaan ama wiiqayaan xeerarka Golaha ka soo baxa.

Qodobka 53aad ee ka hadlaya waajibinta adeegga caymiska, oo leh "hay'addu iyada oo xeer-nidaamiyayaal samaynaysa ayey amar ku bixin kartaa", waxa halkaa ka muuqata in xeer-nidaamiyayaashaas lagu soo saari karo wax aanay dadku qaadi karin. Sidaa darteed, waa in xeer-nidaamiye kasta lagu soo lifaaqaa xeerka inta aan la ansixin.

Sidoo kale, magac ahaan xeerka waa in laga dhigaa "Xeerka Shirkadaha Caymiska Islaamiga ah", si loo caddeeyo in uu ku salaysan yahay Islaami, isla markaana uu noqdo mid la wada leeyahay. Tusaale ahaan, shalay Guddida Qandaraasyadu waxay soo saareen xeer-nidaamiye ka hor imanaya sharcigii lagu sameeyey guddidaas, taasina waxay muujinaysaa in cid waliba sida ay doonto u samaysan karto xeer-nidaamiye.

**Md. Xirsi Cabdilaahi Xirsi (21min, 44sec):** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Mahadsanid Mudane Guddoomiye. Waxaa inoo socotay doodda Xeerka Caymiska, muhiimadda uu leeyahayna waan ku raacsanahay Xildhibaanadii iga horreeyay. Waxaan intaas ku darayaa, maadaama uu caymisku yahay wax inagu cusub, inuu keeni doono farsamooyin cusub. Sidaa darteed, waxaan shirkadaha caymiska u soo jeedinayaa in aanay u arkin fursad ay dadka kaga faa'iidaystaan ama ay ku lunsadaan hantidooda. Goluhuna wuu la socon doonaa marka uu xeerkani ansaxo.

Ugu horreyn, waxaan ku bilaabayaa laba eray-bixin oo aan u arko inay muhiim tahay in xeerka lagu daro. Siicaymiye: waa shirkadaha waaweyn ee caymiya shirkadaha caymiska bixiya, kuwaas oo caymiska ku fidiya shirkadaha bixiya adeegga. Caymiska Dhinaca Saddexaad: waa caymiska loo fidiyo dhinaca ay waxyeelladu gaadho, maadaama caymisku dhex maro saddex dhinac oo kala ah wax-gaadhsiiyaha, shirkadda caymiska iyo la-gaadhsiiyaha.

**Qodobka 6aad** farqaddiisa 8aad ee lifaaqa Guddida, oo ka hadlaya mabaadi'da guud ee xeerka, waxa lagu sheegay in adeegga caymisku yahay adeeg u furan cid kasta oo leh awoodda bixinta caymiska, isla markaana cid gaar ah kooto looguma xidhi karo, sidoo

kalena aan cidna lagu dirqiyi karin. Halkaa, waxaan soo jeedinayaa in laga saaro inta dambe ee odhanaysa “cidna laguma dirqiyi karo”.

Qodobka 9aad farqaddiisa 3aad ee lifaaqa Guddida, oo ka hadlaya ganaaxa shirkadaha caymiska ee ku shaqeysta ruqsad la’aan, xeerku markii hore wuxuu u dhigayay 100 milyan, Guddiduna waxay ka dhigeen 50 milyan. Waxaan soo jeedinayaa in loo daayo sidii hore ee ahaa 100 milyan, maadaama ay ururssadeen hanti dadweyne iyaga oo aan ruqsad haysan, isla markaana aan u arko in xitaa boqolkaas uu yar yahay.

Qodobka 13aad farqaddiisa 1aad ee lifaaqa, oo ka hadlaya hakinta iyo laalista ruqsadda, xarfaha (B) iyo (T) waxaan soo jeedinayaa in la kala hormariyo, lana hor mariyo xarafka (T), maadaama uu ka hadlayo in shirkad aan ku shaqayn mabaadi’da shareecada Islaamka laga hakiyo ruqsadda.

Sidoo kale, farqadda 2aad xarafkeeda (J) oo sheegaysa in muddo 90 cisho ah wixii maxkamaddu xukunto lagu fuliyo, waxaan soo jeedinayaa in muddadaas laga dhigo 45 cisho, maadaama 90 cisho ay tahay wakhti dheer.

Waxaan sidoo kale ku daray farqad cusub oo noqon doonta farqadda 7aad ee qodobka hakinta iyo laalista, taas oo aan u arko mid aad u muhiim ah, kuna qoran sidan: “Shirkadda ay hay’addu laasho ama ruqsadda kala noqoto waa in hantideeda la xanibaa.” Taas macnaheedu waa in haddii hay’ad caymis la xannibo ama ruqsaddeeda lagala noqdo, hantideeda raasamaal la xanibo si dadkii lacagaha ku lahaa loogu celiyo hantidoodii ama maxkamad lagu kala baxo, oo aanay dhicin in dad la dhaco kadibna la yidhaahdo shirkaddii ruqsadda ayaa lagala noqday.

Qodobka 4aad ee xeer-qabyo-qoraalka, kaas oo ka hadlaya codsiga lagu helayo ruqsadda caymiska, farqaddiisa 3aad waxa ay dhigaysaa in lacagta damaanadda ah ee laga hayo shirkadda, oo ah 20% raasamaalka shirkadda, loo hayo damaanad ahaan. Haddaba, halkan waxaan soo jeedinayaa in boqolleydaas laga dhigo 30%.

Qodobka 10aad farqaddiisa 2aad ee lifaaqa Guddida, oo sheegaya in shirkad kasta oo qabata adeegga caymiska ay raacayso mabaadiida caymiska ee habboon, erayga “habboon” ee la isticmaalay waxaan soo jeedinayaa in lagu beddelo “Mabaadiida Caymiska Islaamiga ah”.

Qodobka 12aad farqaddiisa 2aad ee lifaaqa Guddida, oo ka hadlaya qaabka ay hay’addu u yeelanayso maamulkeeda ama dhismaheeda, farqaddaasi waxa ay tilmaamaysaa gole loo bixiyey Golaha Talo-bixinta Shareecada. Halkan waxaan soo jeedinayaa in golahaasi loogu yeedho “Golaha Shareecada”. Sababtu waa in talo la qaadan karo lana diidi karo, halka shareecadu aanay talo ahayn ee ay xukunto; wax ayay xalaalaysaa waxna way xaaraantinimaysaa. Sidaa darteed, meel kasta oo golahani ku xusan yahay waa in laga saaraa “talo-bixin” laguna beddelaa “shareeco”.

Qodobka 14aad farqaddiisa 2aad ee lifaaqa, oo ka hadlaya in Golahani yeesho aqoonta shareecada Islaamka, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro in ugu yaraan hal, isla markaana ay ka haysto shahaado jaamacadeed.

Qodobka 16aad farqaddiisa 1aad xarafkiisa (F) ee lifaaqa Guddida, halkaas waxaan ka beddelay hal kalmad oo keliya, taas oo ah "Ganacsiga Caymiska", waxaana loo beddelay "Adeegga Caymiska". Arrintan waxaan ku taageerayaa Xildhibaan Maxamuud.

Qodobka 21aad farqaddiisa 3aad ee qabyo-qoraalka xeerka, oo ka hadlaya ruqsadda u-dhexeeyayaasha caymiska, waxa lagu tiriyey dad loo yaqaan u-dhexeeyayaal u dhexeeya shirkadda iyo dadka, sida la-taliyeyaasha khataraha, jaangooyayaasha khataraha iyo shil-cabbirayaasha. Dadkaasi waxaa looga baahan yahay in ay yeeshaan aqoon iyo khibrad ku habboon shaqooyinka ay qabanayaan. Sidaa darteed, waxaan ku soo kordhinayaa in shirkaddu hubiso aqoontooda iyo khibradooda, si aanu qof suuqa iska joogaa u odhan "aniga ayaa khatar cabbiraya".

Qodobka 28aad ee lifaaqa Guddida, oo ka hadlaya shirkadaha sii-caymiyaasha, waa qodob aad iyo aad u muhiim ah. Halkan walaac weyn ayaan ka qabaa shirkadaha sii-caymiyaasha, maadaama shirkadaha Afrika bixiya adeeggani ay yihiin kuwo kooban. Sidaa darteed, waa in la hubiyaa in shirkadaha ay shirkadaheenna hoos galaan ee sii-caymiyaasha ahi ay ku shaqeeyaan nidaamka caymiska Islaamiga ah. Waxaan ku daray farqad cusub oo u dhiganta sidan: "Shirkadaha sii-caymiyaasha waa in ay noqdaan kuwo ku dhaqma caymiska Islaamiga ah." Arrintan waa in si adag loo ilaaliyaa, waayo waxa dhici karta in shirkadaheenna ay ku degdegaan inay hoos galaan shirkado waaweyn oo isticmaalaya caymis tijaariga ah.

Qodobka 31aad ee qabyo-qoraalka xeerka, oo ka hadlaya sii-caymiyaasha, waxaan ku daray farqad odhanaysa: "Haddii shirkadaha sii-caymisku ku dhaqmaan caymis tijaariga ah, looma oggolaanayo inay dalka ka shaqeeyaan." Sababtu waa in sii-caymiyuhu soo diri doono dilaal, waana in la waydiiyo shirkaddaas habka caymis ee ay ku shaqayso.

Qodobka 34aad ee qabyo-qoraalka xeerka, kaas oo ka hadlaya codsiga isku-biiridda iyo wareejinta caymiyaha, maadaama ay qaadanayso wakhti, waxaan ku soo kordhiyay qodob u dhiganta sidan: "Isku-biiridda iyo wareejinta caymiyaha waa in hay'addu hubisaa in adeeggii caymiska uu si hufan ugu socdo dadka lacagaha laga hayo." Inta uu socdo habka isku-biiridda ama wareejinta, maaha in dadku meel dhexe ku dhacaan, waana in hay'addu si habboon u maamushaa arrintaas.

Qodobka 44aad farqaddiisa 2aad ee qabyo-qoraalka xeerka, waa qodob aad u xasaasi ah, wuxuuna ka hadlayaa habka loo hanti-dhawri karo hay'adaha caymiska. Qodobku waxa uu sheegayaa in hay'addu magacabi karto shaqsi ku habboon baadhitaanka, taas oo ah arrin aad u halis ah. Haddii mar walba ciddii joogtaa ay keensato hanti-dhawre banaanka ah, waxaa halkaas ka iman kara musuq-maasuq. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in qodobka loo beddelo sidan: "Hanti-dhawrka waxa samaynaya Hanti-Dhawraha Guud ee

Qaranka ama cid uu isagu u soo diro." Hay'addu waa in ay arrintaas u gudbisaa Hanti-Dhawraha Guud, maadaama shirkadaha caymisku gacanta ku hayaan hanti ummadeed oo u baahan ilaalin gaar ah.

Qodobka 48aad ee qabyo-qoraalka xeerka, oo ka hadlaya la-wareegidda maamulka, waxaan u arkaa qodob keeni kara shaki iyo musuq-maasuq, maadaama uu awood u siinayo hay'addu inay la wareegto shirkad caymis. Tani waxay keeni kartaa isku dhex-yaac u dhexeeya shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo hay'adaha dawliga ah. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in qodobkan gebi ahaanba meesha laga saaro, ama in lagu koobo in haddii shirkad caymis shikiso, hantideeda la xayiro ama la laalo; balse hay'addu xaq uma laha inay maamusho.

Qodobka 53aad ee lifaaqa Guddida, oo mudanayaal badani ka hadleen, waxaan qoraal ahaan u beddelay sidan: "Adeegga Caymiska Gaadiidka ee nooca saddexaad (Third-Party) waa waajib." Waajibintaasna waxa ay dhaqan-galaysaa hal sano kadib marka xeerku dhaqan-galo. Sannadka koowaadna waxa uu ahaanayaa mid ikhtiyaari ah. Dhammaan caymisyada kale waa doorasho qofka u bannaan.

Qodobka 56aad ee ka hadlaya ansixinta qaadhaanka, waa qodob aad u muhiim ah. Shirkadaha caymisku waxay qaataan khidmad, dadka laga ururiyana waa qaadhaan lagu magdhabayo wixii waxyeello ah ee dhaca. Qodobku waxa uu leeyahay "hay'addu waxay go'aamin kartaa ugu yaraan ama ugu badnaan ee darajo kasta oo caymis." Halkan waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo "Hay'addu waxay go'aaminaysaa", si loo adkeeyo go'aanka, loona hubiyo in khidmadaha shirkadaha caymiska ay noqdaan kuwo la isla yaqaan.

Sidoo kale, waa muhiim in dadku fahmaan inta magdhow ee ay helayaan; tusaale ahaan, haddii gaadhi gaysto khasaare dhan $10,000, intee ayay hay'addu bixinaysaa. Sidaa darteed, waa in si joogto ah dadka loogu wacyigeliyaa caymiska Islaamiga ah iyo sida uu u shaqeeyo.

Qodobka 57aad farqaddiisa 2aad ee qabyo-qoraalka xeerka, oo ka hadlaya sanduuqa magdhawga caymiska, waxa ka muuqata in turjumaadda Af-Soomaaliga iyo Ingiriisigu ay kala duwan yihiin. Af-Soomaaliga waxa ku qoran in shirkadaha caymiska uu magacaabayo Wasiirku, halka Ingiriisigu uu sheegay in Guddoomiyuhu magacaabayo. Waxaan soo jeedinayaa in tan lagu mideeyo, laguna beddelo in Guddiga Agaasimayaashu magacaabaan.

Ugu dambayn, maadaama aynu waajibinayno arrimo cusub, waxaan soo jeedinayaa in jaamacadaha dalku ay si xooggan u bartaan Islamic Finance iyo sida uu u shaqeeyo. Sidoo kale, waa in aad loo xoojiyo ciidammada la dagaallama maydhaanka lacagaha iyo musuq-maasuqa ka iman kara caymiska. Waa in aynu yeelanaa ciidammo gaar ah oo leh aqoon iyo awood daba-gal, maadaama hay'addu ay xaddidan tahay awooddeeda baaritaan. Waad mahadsan tihiin.

Waxaa shardi ah, ama ugu yaraan in ay ka horrayso, **Siyaasadda Xeerka**, taas oo ka hadlaysa: maxaa xeerka looga baahan yahay? muxuu daweynayaa? halkee ayaa la rabaa in uu gaadho? faa'iido intee leeg ayuu leeyahay? Ilaa maanta wax siyaasad ah oo ay hay'adaha dawladdu inoo keenaan ma jiraan. Sidaa awgeed, Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedinayaa in marka hore la inoo keeno Siyaasadda Xeerka, awooddana la saaro.

Haddii aan gudaha xeerka u galo, xeerkani waxa uu ka kooban yahay 67 qodob oo dhammaantood ka hadlaya **aasaaska shirkadaha caymiska**, halkii ay ahayd in xeerkani ka hadlo **caymiyaha iyo la-caymiyaha**. Labadaa midna kama hadlin, balse waxa uu ku koobmay oo keliya aasaaska shirkadaha, sida uu uga hadlayna waa qaab dulmi ku ah shirkadaha laftooda.

Sidoo kale, xeerkani waxa uu ku jiraa shaqooyin aanu lahayn, sida qaab-dhismeedka shirkadda caymiska iyo qaabka ay isu maamulayso. Taasi ma aha wax xeer khusaysa; waxa keliya ee looga baahan yahay shirkaddu waa in ay buuxiso shuruudaha. Sidaa darteed, waa faragelin toos ah oo lagu sameynayo shirkadaha gaarka loo leeyahay, waana arrin u baahan in si dhab ah looga fiirsado.

Magaca Xeerku sax ma aha. Magaca saxda ah waa **Xeerka Caymiska Qaranka**, waayo xeerku ma aha mid shirkado gaar ahi leeyihiin, ee waa mid qaran, waana in sidaa loo saxo.

Xeerkani waxa uu si toos ah uga hor imanayaa **Qodobka 14aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland**, kaas oo u dhigan sidan:

- Waajibinta cashuuraha iyo wixii takaaliif ah waxa loo eegayaa danta iyo maslaxadda bulshada. Sidaa darteed, cashuur ama takaaliif aan xeer jidayn lama qaadi karo.
- Curinta, dhaafidda iyo wax-ka-beddelka cashuuraha iyo wixii takaaliif ah ee kale xeer ayaa jidaynaya.
- Ribada iyo macaamilooyinka ganacsi ee dhib u leh bulshada iyo ku-xoolaysiga sifo aan sharci ahayn waa reebban yihiin.

Haddaba, maxaa loo jeedaa? Xeerkani waxa uu abuurayaa **tijaar cusub oo sharci ahaan u taajira**, iyada oo dadka markii horeba ka cawdeen shirkado iyo ganacsato jira. Sidaa darteed, haddii aynu maanta kuwo cusub abuurno, waa arrin khatarteedu weyn tahay. Waayo caymiska reerku, inkasta oo shilal gaadiid ay maalin walba dhacaan oo tobannaan qof ku dhintaan, haddana lama arko reero isku dilaya ama colaad ka dhalata.

Xeerkani waxa uu abuuri doonaa dilal, waxa uu abuuri doonaa in maxkamadihii horeba culayska ku jiray ay sii buuxsamaan. Sidoo kale, xeerkani gabi ahaanba kama hadlin **Mabaadi'diisa Guud**, mana qeexin yaa la cayminayaa iyo yaa wax cayminaya. Arrimahaas oo dhami waa ka maqan yihiin xeerkan.

Mudane Guddoomiye, waxyaabaha ugu yaabka badan ee xeerkan ku jira waxaa ka mid ah in **22 qodob** lagu sheegay "Xeer-nidaamiye ayaa qeexaya". Taas macnaheedu waa awooddii xeerku lahaa in la ururiyo gacanta qofka xilka haya. Inkasta oo maanta laga yaabo inuu joogo qof wanaagsan oo wax dhageysta, berri cid kasta ayaa iman karta.

Qodobada ay ku qoran tahay "xeer-nidaamiye ayaa qeexaya" waa: Qodobada 4aad, 8aad, 9aad, 16aad, 17aad, 18aad, 22aad, 23aad, 24aad, 28aad, 37aad, 43aad, 46aad, 48aad, 49aad, 52aad, 53aad, 55aad, 56aad, 57aad, 59aad iyo 67aad. Qodobka 67aad waxa uu xitaa sheegaya in Guddoomiyuhu soo saarayo xeer-nidaamiyeyaasha, kuwa shirkadaha kala diraya, kuwa diiwaangelinaya, iwm. Haddaba maxaynu annagu u qoraynaa xeer, haddii dhammaan arrimaha muhiimka ahi xeer-nidaamiye lagu soo saarayo?

Haddii xeerkan sidaas loo sii daayo, maalin kasta ayaa si baahi ku salaysan loo dhaqaajin doonaa. Shirkadaha caymiskana mid walba ayaa mar la hoos gelin doonaa, iyada oo la odhanayo "markaanu xeer-nidaamiyaha kuu eegnay, waxbaa kaa qaldan", hantidoodiina waa laga wareejin doonaa.

Maadaama uu xeerku sidaas u yahay, isla markaana uu Dastuurka ka hor imanayo, uma baahni inaan sii guda galo faahfaahinta. Waxa kale oo aynu maanta ku abuuraynaa xeerkan hanti ka badan ta ay Maaliyaddu maamusho, oo ay afar qof gacanta ku hayaan. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in xeerkan loo diro **khubaro sharci iyo dhaqaale** oo dib u habeeya.

Waxaa halkan inoo yaalla xeerkii Suudaan iyo kii Kiiniya, kaas oo ka kooban in ka badan 400 cutub, halka xeerkan 67 qodob la doonayo in lagu tirtiro nidaamkii takaafulka iyo iskaashiga dhaqanka ee aynu lahayn. Taasi suurtagal ma aha, dalkana way dhaawacaysaa.

Haddii aan tusaale ka soo qaato Xeerka Caymiska Kiiniya, waxa uu ka hadlayaa:

- Sida caymiska loo samaynayo,
- Diiwaangelinta caymiska,
- Dhigaalka (deposit),
- Hantida iyo daymaha,
- Xisaab-xidhka iyo baadhista (audit & investigation),
- Sida loo diyaarinayo balance sheet.

Halka xeerkan ina horyaalla aanu midna ka hadlin.

Qaybta ugu muhiimsan ee xeerka caymiska, oo ah **caymiska laftiisa sida uu u shaqeeyo**, gabi ahaanba waa ka maqan. Xeerkan waxa uu u badan yahay diiwaangelin iyo maamulka shirkadaha, halka waxa ugu baahida badan yahay ay tahay xidhiidhka caymiyaha iyo la-caymiyaha.

Waxyaabaha kale ee la yaabka leh waxaa ka mid ah in shirkadda caymiska ay iska leedahay shil-cabbiraha khasaaraha, halka Ciidanka Nabadgelyada Waddooyinka meesha laga saaray, lana beddelay qof yar oo shirkaddu dirtay. Taasi waa khatar weyn.

Haddii xeerkan sida uu yahay loo ansixiyo, waxa uu awood siinayaa shirkadaha caymiska, isaga oo aan si faahfaahsan u nidaamin caymiska laftiisa.

Xeerkan maanta ina horyaalla waxa uu ka liitaa xeerkii 1970-meeyadii ay qortay dawladdii milatariga. Haddaba su'aashu waa: hore ma u soconaa mise dib ayaan u noqonaynaa?

Waxaan soo jeedinayaa in xeerkan la joojiyo ansixintiisa, maadaama uusan wax horumar ah keenayn, balse uu dadweynaha u horseedayo dhibaato. Haddii aanan dhib ka reebayn, waa inaanan dhib kale ku sii kordhin.

Marka xeerkan la hagaajiyo, waa in uu tixraaco dhaqankeena, isla markaana odayaasha dhaqanka ay qayb ka noqdaan xalinta khilaafaadka. Haddii reero ku heshiiyaan shil dhacay, shirkadda caymisku waa inay aqbasho heshiiskaas.

Ugu dambayn, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan soo jeedinayaa:-

1. in xeerka lagu daro qodobbo guud oo nidaamiya:
    - Axkaamta heshiisyada caymiska,
    - Siyaasadda caymiska iyo waxyaabaha ku jira iyo kuwa ka reeban,
    - Awoodaha maxkamadaha ee la xidhiidha caymiska,
    - Bixinta magdhawga iyo nidaamkeeda,
    - Xuquuqda cidda saddexaad,
    - Waajibaadka sharci ee la xidhiidha burinta ama ka noqoshada caymiska,
    - Waajibaadka caymiyaha ee aan laga gudbi karin ee xeerka ku qoran, kuwaas oo mustaqbalka maxkamaduhu ku shaqayn doonaan.
2. In noocyada caymiska mid walba si gaar ah loo faahfaahiyo, laguna daro axkaamtiisa u gaarka ah.
3. In axkaamta la xidhiidha waajibka gudbinta xogta saxda ah si caddaalad ah loo qeexo, kuwaas oo ay ku jiraan xogta la siinayo la-caymiyaha, aqoonta uu u leeyahay waxa lagula heshiiyay, si aan loo khiyaamayn, isla markaana loo dejiyo axkaamta maamulaysa caymiska ku dhisan beenta iyo khiyaamada, iyo khataraha lagu xado qalinka.
4. In la qeexo shuruudaha caymiska ee xeereed ee lama taabtaanka ah, si qof walba u ogaado shuruudaha waajibka ah ee ku xidhan caymiska.
5. In si cad loo qeexo sida loo maamulayo sheegashooyinka beenta ah.

Waxyaabahani waa tusaalooyin kooban oo ka mid ah qodobada lagama maarmaanka ah ee xeerarka caymiska ku jira, balse arrimaha ka maqan xeerkani aad ayay u badan yihiin.

Xeerkani, sida uu u qoran yahay, ma aha mid ka jawaabaya ujeeddada uu u degsan yahay ee ah caymis. Sidee ayuu xeer caymis u noqon karaa haddii aanay ku jirin axkaamta guud ee caymiska iyo axkaamta gaarka ah ee nooc kasta oo caymis ah? Miyaynaan ku dhici doonin is-khilaaf xooggan? Miyaynaan abuurayn shirkado caymis oo aanay jirin xeer qeexaya sida ay u shaqaynayaan, una dhexeeya iyaga iyo dadka la caymiska gelaya?

In la ansixiyo xeer degdeg ah wax ka fiican in la ansixiyo xeer lagu shaqayn karo oo wax ka qabta nuxurka uu ku saabsan yahay. Maanta dadku waxa ay ka cawdaan cashuurihii laga qaadayay oo aan waxba laga celin.

Haddii aynu doonayno in aynu abuurno ganacsato cusub oo madhan oo lagu ururiyo hantida dadka iyada oo aan xeer sugan loo hayn, Mudanayaal, waa dambi ina saaran. Annaga waxa naloo doortay in aynu ka faydno dhibaatooyinka, nalooma dooran in aynu dhibaatooyin cusub abuurno.

Xeerkani ma qabo wax loo dedejiyo, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal. Ma jiro wakhti nagu khasbaya, mana jiro wax ina eryanaya. Waxa hore u jiray habab lagu xallin jiray dhibaatooyinka. Sidoo kale, yaan loo qaadan in dadka shirkadaha samaynaya aynu ka soo horjeedno; anigu ahaan, Maxamed Abiib ahaan, waan u ololeeyay xeer caymis markii aan musharrax ahaa, waxaanan ku doodayay in ninka baadiyaha jooga ee neefkiisa geela ah iyo ninka magaalada gaadhiga ku wata loo sameeyo nidaam caymis si loo wada badbaado.

Sidaa awgeed, xeerkani sida uu yahay looma baahna. Waxa loo baahan yahay waa xeer anfaca bulshada, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Axmed Cabdi Ducaale (Walhad) (06min, 17sec):** Bismillaahi Raxmaan Raxiim. Shir-guddoonka, Xildhibaanada, Shaqaalaha iyo Saxaafaddaba waan salaamayaa.

Aniga oo soo koobaya dooddii, kama hadli doono Qodobka 53aad ee Guddida gaarka ahi ka saartay xeerka. Ugu horrayn waxa loo baahan yahay in la fahmo waxa uu xeerkani yahay, lana ogaado in uu yahay **xeer mustaqbal**, lana doonayo in si waarta looga faa'iidaysto.

Maadaama uu xeerkani yahay mid mustaqbal ah, waa in aynu si weyn uga taxaddarnaa samayntiisa, annaga oo ilaalinayna shareecada Islaamka. Shaki kuma jiro in dunida oo dhami ay leedahay xeerar caymis oo ay ku dhaqmaan, innaguna dadka kama liidanno, mana ka maskax yarin; waanu samayn karnaa xeer innagu habboon.

Ugu horrayn waa in aynu fahannaa in caymisku u qaybsamo noocyo kala duwan. Caymisku guud ahaan waa ka-hortag khatar, si qofku u helo cid ka caawisa marka ay dhibaato timaaddo. Marka shareecada laga eego, culimadu way isku khilaafsan yihiin, hase

yeeshee waa wax mararka qaarkood banaan, dunida Islaamkuna si weyn ayay u isticmaashaa.

Caymisku guud ahaan wuxuu u qaybsamaa laba qaybood: caymiska nafta iyo caymiska hantida. Anigu ma aaminsani in caymiska nafta khasab laga dhigo, balse caymiska hantida waa in khasab laga dhigaa. Sababta waxa weeye haddii gaadhi qof jiidho oo aanu bixin karin khasaaraha, waa in uu helo cid magdhowga ka bixisa. Sidaa awgeed, caymiska hantidu waa inuu noqdaa mid khasab ah.

Masuuliyadda xeerkan innaga ayay saaran tahay. Waa in aynu si qoto dheer uga fiirsannaa ka hor inta aynaan ansixin. Markaan akhriyay xeerkan, waxa si aad ah ugu badan xeer-nidaamiyeyaasha, sida ay xildhibaanadii iga horreeyayba sheegeen. Sidaas darteed, waa in xeerka laftiisa lagu qeexaa arrimaha muhiimka ah, si aan qof walba u fasiran sida uu doono.

Xeerkani waa in wakhti la siiyaa, Mudanayaal, lana raadiyaa macluumaad dheeraad ah, ha noqoto dalalka deriska ama kuwa kale.

**Md. Siciid Jaamac Xasan (06min, 17sec):** Mahadsanid Mudane Guddoomiye. Sida ku cad Qodobka 1aad ee Guddida gaarka ah, dunida waxa ka jira laba nooc oo caymis ah: mid macaash-doon ah iyo mid tacaawun ah. Diinteena Islaamkuna waxa ay oggolaatay kan tacaawunka ah, oo ah heshiis laba dhinac ah oo cad, u dhexeeya caymiye iyo la-caymiye.

Qodobka 5aad, Farqadiisa 4aad, oo sheegaysa in la helo adeegyo caymis oo waafaqsan shareecada Islaamka iyo mabaadi'da Dastuurka, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro Jamhuuriyadda Somaliland (JSL).

Qodobka 6aad, Farqadiisa 8aad, oo dhigaya in adeegga caymisku u furan yahay cid kasta oo awood u leh bixinta adeegga, isla markaana aan cid gaar ah kooto loogu xidhin, sidoo kalena aan cidna lagu dirqiyi karin; halkaa waxaan la qabaa Xildhibaan Xirsi qaybteeda hore, balse waxaan soo jeedinayaa in laga saaro qaybta odhanaysa "cidna laguma dirqiyi karo".

Sidoo kale, waxaan soo jeedinayaa in Farqad cusub lagu daro, oo noqota Farqadda 9aad, si looga hortago caymiska macaash-doonka ah, una qorna sidan:

**Qodobka 6aad, Farqad 9aad:** "Hay'adda Caymiska Dawladda iyo cid kale toona ma waajibin karto adeeg caymis khasab ah, maadaama shareecada Islaamku xaaraantinimaysay."

Qaybta 2aad, Qodobka 3aad (oo noqday Qodobka 9aad) ee ku saabsan ruqsad-siinta shirkadaha caymiska, waxaan soo jeedinayaa in lagu beddelo "Liisan-siinta Shirkadaha Caymiska", isla markaana meel kasta oo lagu sheegay ganacsiga caymiska lagu beddelo caymiska Islaamiga ah.

Farqadda 3aad ee Qodobka 9aad, oo dhigaysa ganaax SL 50,000,000 ama xadhig ciqaabeed, waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo ganaax u dhexeeya SL 1,000,000 ilaa 50,000,000 ama xadhig ciqaabeed u dhigma, iyadoo loo eegayo baaxadda iyo xaddiga caymiska sharci-darrada ah ee la bixiyay, si loo kala saaro qofka khalad mar kaliya galay iyo kan ku celceliya.

Qodobka 6aad (oo noqday Qodobka 11aad) ee Go'aanka Liisan-bixinta, Farqaddiisa 4aad, waxaan soo jeedinayaa in meesha laga saaro, laguna beddelo Farqad cusub oo dhigaysa in qofka ku qanci waaya go'aanka Hay'adda Caymiska uu rafcaan u qaadan karo Maxkamadda Sare muddo 15 maalmood gudahood. Sababta aan Guddi uga saaray rafcaanka waxa weeye, ma aha mid caddaalad ah in qofkii wax diiday isla isaga loo dacwoodo.

Sidoo kale, waxaan soo jeedinayaa in lagu kordhiyo **Farqad 5aad**, iyada oo farqaddan lagu laalay oo meesha laga saaray **Farqadda (F)** ee **Qodobka 10aad** ee **Xeerka Aasaaska Hay'adda Caymiska, Xeer Lr. 92/2020**, anigoo ku sababaynaya:

1. **Guddida Siyaasadda Hay'adda** waxa ku jira, isla markaana xubin iyo xoghaynba ka ah, **Guddoomiyaha Hay'adda**; sidaas awgeed, kii liisan-siinta diiday haddana kama caban karo isagii.
2. Guddidan waxa xubno ka ah **Wasiirka Maaliyadda**, **Guddoomiyaha Baanka Dhexe**, **Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga**, **xubin ka socota Garyaqaanada**, **Wasaaradda Awqaafta**, iyo xubno kale oo ay adagtahay sida ay isugu iman karaan ama u fadhiisan karaan.

**Qodobka 7aad** oo hadda noqday **Qodobka 12aad** (Cusboonaysiinta Ruqsadda/Liisanka), meel kasta oo erayga *Ruqsad* ku qoran yahay, waxaan soo jeedinayaa in lagu beddelo **"Liisan"**.

**Qodobka 8aad** oo hadda noqonaya **Qodobka 13aad** (Hakinta iyo Laalista Ruqsadda), waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo sidan: **"Hakinta ama Laalista Liisanka"**, oo ka koobnaanaysa **5 farqadood**, anigoo meesha ka saaray **Farqadda 4aad** oo u dhignayd:

4- Haddii shirkadda caymiska ee ruqsadda laga hakiyey ama laga laalay ku qanci waydo go'aanka hay'adda, waxa ay muddo **toddoba (7) cisho** gudahood ah racfaan u qaadanaysaa **Guddida Hoggaaminta Siyaasadda Caymiska Qaranka**.

Waxaan soo jeedinayaa in farqaddaas loo beddelo sidan:

4- Haddii shirkadda caymiska ee **Liisanka** laga hakiyey ama laga laalay ku qanci waydo go'aanka hay'adda, waxa ay muddo **shan iyo toban (15) cisho** gudahood ah racfaan u qaadanaysaa **Maxkamadda Sare** ee awoodda u leh.

**Qodobka 18aad** (oo hadda noqday **Qodobka 22aad**) ee **Ansixinta Qaadhaanka iyo Qiimaha Khidmadda**, Farqaddiisa 2aad ee ay Guddidu u beddeshay sidan:

“Guddida Hoggaaminta Siyaasadda Caymiska Qaranka ayaa jaangoynaysa qaadhaanka ugu yar ama khidmadda ugu badan ee darajo kasta ama nooc kasta oo ka mid ah adeegga caymiska.”

Waxaan soo jeedinayaa in meesha laga saaro ama loo beddelo sidan: “Qaadhaanka iyo khidmadda darajo kasta ama nooc kasta oo ka mid ah adeegga caymiska waxa ku heshiinaya **Shirkadda Caymiska** iyo **la-caymiyaha**, si waafaqsan **Xeerkan** iyo **Shareecada Islaamka**, ama cid loo igmaday sida **Guddida Culimada** ee Xeerku tilmaamay oo laga ansixiyey **Golaha Wakiillada**.”

Sababtu waxa weeye: haddii hay’ad ama cid aan awood u lahayn ay jaangoyso khidmadda—ha yaraato ama ha badnaato—waxay keeni kartaa **waajibin khasab ah** oo aan waafaqsanayn **Caymiska Islaamiga ah**. Haddii wax la waajibiyo, waxay noqonaysaa “**bakhtiga ma cuno ee fuudkiisa ayaan cabnaa**”.

**Qodobka 53aad** (oo hadda noqday **Qodobka 57aad**) ee **Waajibinta Adeegga Caymiska**: Waxaan la qabaa soo jeedinta **Guddida Dhaqaalaha** ee ah in gebi ahaanba qodobkan meesha laga saaro, si aanay uga dhalan waajibin xaaraan ah, iyo soo jeedinta **Guddida Gaarka ah** ee ku raacday aragtidaas.

Waxaan qabyo-qoraalkii hore ee Guddida Dhaqaalaha ku soo lifaaqnay **qoraalkii culimada ugu caansan dalka** ay soo saareen; sidaas awgeed, waa in aynu raacnaa **Shareecada Islaamka**.

**Qodobka 69aad** (oo hadda noqday **Qodobka 76aad**) – *Xeerkan iyo Xeerarka Hore*, Farqaddiisa 3aad: Sixid ayaan ku sameeyey **khidmadda Hay’adda Caymiska** ee la qaadayo; waxa loo raacayaa si waafaqsan xeerkan, nuxurkiisuna waxa ku tilmaaman **Qodobka 28aad** (oo hadda noqday **Qodobka 23aad**) ee **Xeerka Hay’adda Caymiska Qaranka**, **Xeer Lr. 92/2021** (oo beddelay **Xeer Lr. 92/2020**) sida lagu jideeyey xeerkan. **Khidmadda 2%** ee Hay’adda waa in ay ka go’daa **khidmadda Shirkadda Caymiska**, si **la-caymiyaha** aan looga qaadin laba khidmad.

**Gebogebo**, waxaan u soo jeedinayaa **Xukuumadda**: maadaama **Xeerka Aasaaska Hay’adda Caymiska** nuxurkiisa loo curiyey in lagu khasbo baabuurta dalka lacag sannadle ah oo khasab ah, iyada oo marar badan la bixinayo lacago xad-dhaaf ah oo aan sharci lahayn, in **Hay’adda Caymiska la baabi’iyo**, shaqaalaheedana hoos loo geeyo **Wasaaradda Gaadiidka**, lagana dhigo **waax ka mid ah**, loona bixiyo **Waaxda Shirkadaha Caymiska**.

Waxaan kale oo soo jeedinayaa in **Xeerka Caymiska Shirkadaha Islaamiga ah** aan lagu degdegin, balse loo aqoon-badiyo lana helo **khubaro Islaami ah oo caalami ah**.

Waxaan soo jeedin lahaa in **xeerkani yahay xeer aad u ballaadhan**, una baahan in **si qoto dheer gudaha hoos loogu galo**, sababtoo ah **tiirarkii uu marka hore ku dhismi lahaa Caymiska Qaranku kama muuqdaan**. Waxa kale oo uu u baahan yahay in la caddeeyo **sida shirkadda Caymiska Qaranku u dhismayso marka hore**. Arrintu marar badan way soo noq-

noqonaysaa, dadka inaga maqanna waxa ay siinaysaa **awoodyo badan** oo hadhaw **xilkeedu inagu soo fuuli doono**.

Waxaan qabaa, sida la sheegay, in **dad aqoon ballaadhan u leh la raadiyo**, in **dalalka caymiska leh** aynu ka soo qaadanno **sida ay u shaqeeyaan**, annaguna aan ka qaadanno wixii **inaga khuseeya ee waafaqsan Shareecada Islaamka**. Xeerkani ummaddu way u baahan tahay, dhibaatooyin badanna way jiraan, gaar ahaan kuwa haysta **masaakiinta miyiga**, oo haddii gaadhi wax jiidho **reer miyiga ayaa loo doonayaa**.

Xeerku waxa uu u baahan yahay **in si dhab ah loo gudo galo lana saxo**. Sidaas ayaan soo jeedinayaa.

**Md. Mubaarik Muuse Ismaaciil:** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Asalaatu Wasalaamu Calaa Ashrafil Ambiyaa'i wal Mursaliin, Sallallaahu Calayhi wa Sallam.

Marka ugu horreysa, anigu xeerkan waan soo akhriyey, balse **gudihiisa si buuxda uma aanan gelin qodobadiisa**. Sababta aanan aad uga hadlin waxa ka mid ah inaan dareemay in **xeerkan, marka ugu horreysa, tiirka uu ku dhisan yahay iyo qodobada la soo jeediyey aan loo hayn dadkii aqoonta u lahaa takaafulka caymiska**.

Marka xeer la keenayo ama lagu dhaqmayo, waxa loo baahan yahay in **dadka hawsha wada—shirkadaha, Hay'adda Caymiska iyo cidda garnaqaysa—ay wada leeyihiin aqoon shareeco iyo caymisba**. Shaqaalaha shirkadaha hadda jira iyo mabaa'diida ay ku shaqeeyaan **ma laha caymiskii takaafulka ee shareecada ku dhisnaa**. Haddii aynu caymiskan si degdeg ah ugu dhaqaaqno, waxa khatar ah inay u arkaan **inuu la mid yahay wixii ay hore ugu dhaqmayeenn**, oo ay sharciyadooda wax ka beddelaan iyaga oo u malaynaya inay shareecada ku saleeyeen.

Xeerku kuma xusna in **dalalka leh caymiska takaafulku ay leeyihiin Guddida Shareecada**, kuwaas oo kala saara marka la isku qabto xeerka ama faa'iidada ka soo baxda sida loola dhaqmi lahaa. Annagu **Guddidaas ma hayno**; culimadeennuna way kala duwan yihiin, wax heshiis ah oo ay ku mideysan yihiinna **ma jiro**.

Xeerkan kuma cadda, inkasta oo aynu leenahay **ku salaynaynaa Shareecada Islaamka**, in la hubinayo in **lacagta dhigaalka ah ee shirkadaha caymiska dhigayaan ay ku timid si Shareecadu oggolaatay**, oo aanay ka iman ganacsiyo kale oo xaaraan ah. Tusaale ahaan, qof ku jira ganacsi aan Shareecadu oggolayn oo lacag ka sameeyey, haddana yidhaahda caymis ayaan gelinayaa—arrintaas xeerku **kuma qorna**.

Waxa kale oo loo baahan yahay in la hubiyo in **dadka ka shaqaynaya shirkadaha caymiska—ha noqdaan shaqaale ama maamul—ay leeyihiin aqoon farsamo (technical expertise)**. Dunidu marka shirkado samaynayso, shaqaalaha way soo iibsanaysaa; waddamada Carabtuna tusaale ayay inoogu yihiin, iyaga oo ka soo qaata Malaysia iyo India. Annaga, shaqaalaha hadda jooga—kuwa hay'adaha ama shirkadaha—**khibrad aqooneed uma laha caymisyadaas**.

Wax aqoon farsamo oo caymis shareeco ah oo la isticmaalay **inaga ma jirto**. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in **inta aan sharcigan la ansixin**, la xoojiyo **deegaanka uu sharcigani ka shaqayn doono**, in la helo **technical experts**, aqoontana la kobciyo, lana baro dadka **sida caymisku u shaqeeyo**.

Xeerkani waa **xeer ballaadhan**, waxaana xildhibaanada u soo jeedinayaa **inaan lagu degdegin ansixintiisa**.

**Md. Xirsi Cabdillaahi Xirsi:** Guddoomiye, waxaad mooddaa inaan taagan nahay halkii aynu taagnayn kal-fadhigii hore. Kal-fadhigii hore ayaynu codsanay in xeerkan dib loo riixo. Dhib malaha; waxa ku jira waxyaabo aynu hore u dareensanayn, halkan se waxa aynu ka hadlaynaa **shareecada**. Golaha waxaan u soo jeedin lahaa in **cid inoo maqan aanay jirin**; 82 xildhibaan ayaa la soo doortay, aqoon waynu leenahay, waanan baadhi karnaa, cid kalena waan la hadli karnaa—**inaga ayaa nalaga sugayaa**.

Haddii aynu laba bilood dib u dhigno, laba bilood ka dibna arrintani waa taagnaanaysaa. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedin lahaa **ad-hoc committee kooban** oo wakhti kooban leh, idinkuna aad soo jeedimihiinna ku xoojisaan.

Waxaan u arkaa in hawshu ku taallo **laba qodob**: mid waa la isla gartay—**waxaa la isticmaalayaa caymis xalaal ah (takaaful)**—sidaas awgeed wax xaaraan ah ma soo geli karo. Qodobka muranku ka taagan yahayna waa **in la waajibiyo mise aan la waajibin**. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedin lahaa **baadhis wakhti kooban**. Laakiin in xeer dhan intan leeg la daadafiyo—iyadoo xeerarkii hore ee aynu samaynay ay ku salaysnaayeen aqoonta dalkeenna—haddii aynu mar kasta nidhaahno aqoon ma lihin oo aynu u banayno cid kale, arrintu halkaas bay taagan tahay.

**Md. Sheekh Axmed Dayib Aadan:** Guddoomiye, waxaan xoojinayaa in xeerka **akhris labaad loo diro**, waxaanan samaynayaa **saddex baraarujin**. Tan Xildhibaan Xirsi ka hadlay—caymiska takaafuliga ahi **wuxuu ku dhisan yahay tabaruc**, tabaruc iyo khasabkuna **isma galaan**. Masaajiddada marka wax laga ururiyo, ma khasab baa?

Dawlado badan oo la tusaaleeyo, culimadoodu **ma ay sharciyeyn xilli dambe**; hore ayaa baarlamaanno u sharciyeeyeen. Ogaalkayga, **mad-hab fiqhi ah oo yidhi waa la khasbayaa ma jiro**. Sidoo kale, annagu waa **Shaafici**, culimadeennuna fataawo bay bixiyeen. Dal walba waa in culimadiisa la tixgeliyaa, wixii shareecada ka hor imanayana laga ilaaliyaa.

Waxaan ku soo ururinayaa: **dalkeennu culimo waaweyn ayuu leeyahay**, fataawooyinkooduna way jiraan—lix fataawo oo culimada waaweyn ah. Sidaas awgeed, waa in aynu **raacnaa mad-habkeena Shaaficiga**. Qofka waxa lagu dirqiyi karaa masuuliyad, balse **maalkiisa laguma dirqiyo**. Nabigeenna (SCW) wuxuu sheegay in maalka qofka uusan xalaal noqonayn ilaa uu isagu bixiyo. Sidaas awgeed, **qofka ha loo daayo ikhtiyaar**, lagumana dirqiyo.

**Md. Abubakar Siciid Cali:** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Al-xamdulillaah, wa bihi nastaciinu calaa umuuri dunyaa wa diin, wa sallallaahu calaa Sayyidinaa Muxammad (SCW).

Mudane Guddoomiye, sida aan wada dareensanahay, **xeerkani wuu kakan yahay**, mana aha markii ugu horreysay ee Golaha loo keeno. Waxa se muuqata in **Xildhibaanada iyo Guddiyadii loo saaray labaduba aanay si isku mid ah uga wada qayb qaadan**, xitaa Guddidii ad-hoc-ka ahaydna ka-qayb-qaadashadeedu ma dhamaystirnayn, waana ta keentay in qaybo badan oo xeerka ah ay weli muran ku jiraan.

Waxaan soo jeedinayaa, Guddoomiye:

1. **In xil la iska wada saaro**, xubnaha Goluhuna **masuuliyad wada qaataan**, si qoto dheerna **u galaan** arrinta.
2. Mudane Guddoomiye, waxaanu soo jeedinaynaa in **Golaha la horkeeno dad khubaro ah** oo **islaami ahaan ugu soo shaqeeyey**, kuwaas oo **soo bandhiga faa'iidadiisa iyo faa'iido-daradiisa**; dhammaan xubnaha Golaha ee joogaana **su'aalo ka weydiiyaan**. Sidoo kale, **culimada ha la keeno**, maadaama ay jiraan kuwo **diidan** iyo kuwo **taageersan**.
3. Waxaan Guddoomiye **codsanayaa**, aniga oo **laba jeer ka qayb qaatay**, in **fahanka xeerka ee xildhibaanada la kordhiyo**, lana helo **ka-qayb-qaadasho guud**, iyada oo **khubaro la keenayo**.
4. Waxaan soo jeedinayaa in **guddi cusub loo saaro**, oo **si firfircoon uga qayb qaata**, ka-qayb-qaadashadiisa iyo doodiisana **loo horkeeno Golaha**, lana keeno **culimo iyo khubaro ku soo shaqeeyey caymiska takaafulka ah**.

**Guddoomiye Cabdirisaaq Khaliif:** Wuu mahadsan yahay Mudane Abubakar. Xeerku mar kasta waxa uu inoo soo celcelinayaa **muhiimadda uu leeyahay**. Waxa aynu isku waafaqsan nahay in **qabyow ka muuqdo**, gaar ahaan **xeer-nidaamiyayaashiisa** iyo **qaab-dhismeedkiisa**, kuwaas oo ay wax badan ku jiraan. **Cid aynu ka maarmi wayno** waynu kala tashan doonaa ama **Golaha weynu horkeeni doonaa**, ha noqoto **culimo** ama **khubaro kale**, aqoonyahankeennana ama innaguba **isku-guris dedaal** waynu gelin doonaa.

Mar kasta, innaga waxa inoo ah **muhiim**, haddii aynu **dib u dhigno** iyo haddii kaleba, waa wax aynu **ku dul dhisnay xeerkii**, dhismihiisiina **ku korodhay**. Marka **soo jeedimaha** marka aynu samayno, **Golaha** ayaynu u qaybin doonaa. Haddii aynu doonno **bog Golaha u furan** oo ay dhammaan mudanayaashu ku jiraan, ayaynu **dood ka furi karnaa**.

Si kastaba ha ahaatee, marka aanu **isku soo gurno xeerka**, doodiinii iyo **araadiinnii**, iyo **cidii aynu la tashanay**, annaga oo waliba **xeerka si fiican u soo ururinayna**, waanu idiin soo gudbin doonaa. Anigu **ma arag**, sida uu sheegay **Xildhibaan Maxamed Abiib**, in **22 qodob** ay tilmaamayaan **xeer-nidaamiyayaal aad u badan**; arrintaas **waan soo ururinaynaa**. **Culimadii ka soo fatwootay** waa culimo aad u yar; sidoo kale waxa meesha ku jira

**maqnaanshaha Guddida Shareecada**, taas oo wax badan qaban lahayd sida **axkaamta, eedaha iyo fatwooyinka**—kuwaas oo innaga maqan.

**Xeerkii aqoonta** oo isna doodiisii taagnayd, **waan idinla wadaagi doonaa**, Insha Allaah **Sabtida. Goluhuna wuu inoo xidhanyahay.**

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ------------------------------------------------- | -------------------------------------- |